

## Idaacada VOA oo isu badshay Radio Muqdisho: Jawaab Axmed Faarax Idaajaa iyo Daaroodeynta xarakadii Daraawiishta

*Suldaan Maxamud Cali Shire (Hindi) oo ahaa nimankii Ingiriiska kala saftay Daraawiishta oo bilad ka gadoomaya Boqorada Ingiriiska Elizbeath II Magaalada Cadan 1956.*



Haday la socodeen akhristayaasha (hadhwanaagnews, oodweynenews iyo Togahere) Maqaalkan kii ka horeeyay kuna saabsanaa wuxu Jaale Idaajaa ka afuufo idaacada isubadshay **Radio Muqdisho** ee **VOA** hada laga faafiyo taariikhaa **neo-Daaroodism** oo si yar oo maldahan daddka lagu beerlaxawsto Wadanimu aan jirin ka dibna si reer-raysan oo sibiq-sibiq ah , taariikh kaste la hoos galiyo amaan Ina-Carro oo dadyowga ku abtirsada heybta Jaale Daarood magaca **Sayid** oo awowgoodna loogu wan-qalin ula baxeen, hayse yeeshee magacaas Aal-al-Beyt ku shaanbadeeyay duuflaalkii ina Carro Seed Magan.

Maqaalkii hore wuxu ku saabsanaa sida dadban ee u Jaale Idaajaa reerka Isaaq si maldahan ugu gaaleeyo kuna tillmaamo daba-dhilif Ingiriis isagoo adeegsanaya eryada **“Tolalkii somaliyeed ee gaalada raacay”** , **“Ingiriis iyo kuwo watay** , **“ingiriis Kuwii la socoday”** , **“ Gaalo iyo Cawaankood“** **“ sayid maxamed oo mar kaste reerkaa Diintooda muran galin jiray”** waa weedhaha ee u ku isticmaalay programkiisii 58naad-61aad iyo 40kii sanadood ee u danbeeyay isaga iyo Jaale Aw Jaamac Cumar Ciise ayagoo markaas xalaalaynaya taariikh xumadii **Ina Carro Seed Magan** ee markaste ku dheehan gabayadiisa.

Jaalayaashuu se marna dadkana ma xasuusinyaan mana sheegaan wuxu Ina Carro isla Daarookiisa ku sheegi jiray iyo reeraa kale ee Somali , sabab ujeedadda ayaa ah reeraa Somali ee kale Isaaq gaar ahaan uga sooca , si la moodo in wax gaar ah Ina Carro Isaaq ku tilmaami jiray, waana dhaqan u caadaystay ilaa waagii Kacaankii Afweyne inu mar kaste isaga iyo Aw Jaamac ka reebaan reerka Daaroodka af xumadii ina Carro kula dul dhici jiray , reerka Isaaqana mar kaste far-waaweyn lagu iftiimiyoo afarlaydu hoga uga soo tiring jiray, inkastoo aanay badnaynba gabayada ina Carro u tiriyay Isaaqa maadama

Isaaqaba ay Daraawiish iska arkiin jilibada H.Y bari iyo H.J bari halka Daaroodka gebi ahaanba Daraawiishtu dhex dagtay habeen iyo maalina dhici jireen maatadooda ,Harti iyo Absame ba. Haduu Isaaqa gaalo ku sheegay , Idaajaa iyo Aw Jaamac waxay ahayd inay noo sheegaan cida aanu ina Carro gaalayn ? . Gabayada ina Cabdulle Xasan hadii cay qabiil loo adeegsado waxan qabaa oo muran-l'aaneed ah in gabayada kuwa ugu xun iyo cay inta ugu xun u Daaroodkiisa ku shaanbadeeyay oo muranba galiyay ragnimadooda , tusaale marku hadal ku soo koobay Daaroodka:

*Waa niman sidii dumar haween laga danaystaaye*

### **Maxay ku caan baxeen labada Jaale ee Somali ku baratay**

Jaale Idaajaa iyo Aw Jaamac Cumar Ciise oo labadoodaba taariikhda somaliyeed ku soo biiray magacoodu kacaankii Maxamed Siyad Bare ka dib , kana soo baxay labadudba xarumihii Daaroodismka 1970gii. Waxay labadaa shakhsiyadood dawladii Afweyne mar kaste ku halayn jirtay kaalinta Daaroodeynta-Taariikhda Somaliyeed, ilaa ay gaadhsiiyeen heer waali ah oo Axmed Ibraahim Al-Ghazi iyo Araweelo midna Mareexaan laga dhigay midna Dhulbahnate Ogaadeena loo hanbeeyay fulaygii Cigaal Shidaad. Isbahaysiga Mareexaan , Ogaadeen iyo Dhulbahnate oo isagoo awal baa ahaa isbahaysi siyaasadeed M.O.D ka dibna mid taariikh gacan ku rimis ahna laysu gaashaanbuuraystay.

Intii dawladii Jaale Daarood jirtay 1969-1990 waxa “**akaadmiyada fanka iyo suugaanta**” **The Somali Academia Of Literature and Art** , oo hogaankeeda loo kala qeybiyay Aw Jaamac Cumar Ciise iyo Axmed Faarax Idaajaa , loo adeegsan jiray fidinta iyo abuurida taariikh somaliyeed oo reeraysan . **Madbacada Qaranka** buugaagta Somalia ku saabsan nooc kaste ha noqotee waxa haysan jiray Axmed Faarax Idaajaa inadeerkii (**Ina-Caano-Geel**) , buugaagta la daabici jirayna waxay soo mari jireen Idaajaa sidu afkiisa ka qirtay mar ay dhawaan waraysi ka qaadeen Idaacad somaliyeed oo reerkisa u badan carrada USA (waraysiga [www.youtube.com](http://www.youtube.com) ).

Waxa alaale iyo wixii madbacada qaranku daabciday manhajayada iskuulka gaar ahaan taariikhda somaliyeed wixii khuseeya iyo suugaanta , wax aanay Daarood isku mahdin isbaarada Idaajaa iyo Aw Jaamacna soo marin lama daabici jirin. Taas oo kaliya kuma eekayn programka Daaroodeynta Taariikhda Somali ee waxa dheeraad ah magaacbida goobaa loogu magac dhabay “hormoodkii xornimada iyo tacaliinta” kuwaasna waxa laga daba geeyay meelo lagu magco daray niman reer miyi ahaan jiray oo gabayaada Somali ama salaadiinta Somali ka mid ah se waxba dheerayn gabayaagii dhegooda ahaa , waxa ka mid ah , iskuulada **Wiilwaal** iyo **Raage Ugaas**.

Markii si kale loo suuro-galin kari waayay waxay ragaas ku mutaysteen ku magaacibda iskuulo (dadkoo ogsoon inaanay midkoodna wax akhriyi jirin waxna qori jirin) Jaalee idaajaa wuxu ku jawaabi jiray “**Raage Ugaas gabayada somaliyeed wuxu ku soo kordhiyay Hoyaleeyay Hoyaale**” muuji meeshu ka keenay macaluumaatkaas iyo wuxu daliil uga dhigay.

Wixii wakhtigii dawladii Afweyne la ilaaway in la Daarooddeeyo ooy ugu weyntay qorista farta Somaliga iyo abwaankii lahaa heesta Calanka, hawashaasna dhawaan ayay qurbaa ka bilaabeen Aw Jaamac Cumar Ciise iyo Axmed Faarax Idaajaa. Qoraal dheer oo arintaas ku saabsan ayuu dhawaan labada jaale mid soo bandhigay , waraysi shabakada www.oodweynews.com dhawaan ka qaaday Aw Jaamac Cumar Ciise oo nin yar oo warayi ah waraysanayaan aan arinta iyo shakhsiyadu waraysanayba wax ka ogayn wuxu Aw Jaamac soo tiriyay dhowr nin oo wada beeshiisa ah inay qoreen farta af Somaliga .

Farta af-Somalia waxaba la odhan karaa Europeaniki dhulka Somali gumaystay ayaa qoray , hadaynu tusaale soo qaadano Ltd Kirk buugiisa af Somali ku qoray 1905 , waraysigan Ltd Kirk af Somali ku qoray waa waraysi askari Somali ah oo ka sheekaynaya dagaaladii 1901:

Firdhidin. July 16 1901 Kirk's Somali ethnography

*'Ollki o dan iyu Bohotle iss ugu yimid. Dabad^dna ilalo iyannu ka dinei. Kurmis iyei gel badan ku so araktei. Ilalodi ba so nokhotei, gel badan iyannu aragnei, 'ollki o dan iya gurei, dabadedna Kurmis iyannu tagnei. Allegheri gel badan laga so ghadei. Shan iyo t6ban 'asho iyannu fadine. Dadki hdlahalaha ba no yimid. Dadki iyu " Colonel "-ki u yimaden. Wuhhu yidahhei, " Edinkannu idin ra'ena, adigi iya lo 'elin " (will be recovered). Kolkasu yidi, " Hadeidin ra'esdn adigi iyan idin ku 'elfneya. Reraha o dan so rera o agteda kena." Kolkasi Allegheri na ra'ei. Kolkasu yidi, " Wadadki bannu idin la d6nena." Dabad^d iyannu gurrei. B6hotle iyannu nimid. Ragi buka o askarrtaaha iya B6hotle lagu rebei (were left behind), dabaddna Bohotle iyannu ka gurrei. Wahhannu degnei Wudwud, dabadd ilalo Wudwud iyannu ka dirrei. Wahhai yidahhen, "Wadadku wa f6gyahai." Kolkasannu ka gurrei, shan haben iyo shan dararod so so'onei. Dararti dambe iyannu 'ollki wadadka iss hellei (met). DabadM iyannu dirirrei. Wahhai kaga dilen shan iyo t6ban askari iyo sirkdlki af-Arabad (i.e. Capt. Friedrichs). " Dickinson " sahib rasas ba ku da'dei, b6dodi kaga da'dei. Shan iyo labaton askari iyei rasasti ku da'dei, an dimanin (without being killed). Kolkas iyannu biyo wehna (could not find) o so nokhonei. Wahhannu ka so baghanei, askarri hadanei biyo haison, wa bakhtiyesa. Shan iyo t6ban 'asho iyannu Berberah u so dahhnei. Kolkannu halkan nimid, askarri gel badan la siyei, hawildarki sadehh halod iya la siyei, ninki jemadarkaaha afar ba la siyei. Askarri fasahh, nin ba bil fasahh iyu helei. " Force "-kan halkas iyu ku damadei.*

Firdhidin July 16 1901 Kirk's English translation

*The whole force came together to Bohotle. And afterwards we sent out illalos, and they found many camels at Kurmis. The*

illalos came back and we saw many camels ; the whole force loaded up, and we went to Kurmis. The Allegheri were looted of many camels. We stayed fifteen days. The owners of the animals came to us. The people went to the Colonel and said, " We will follow you, and the sheep will be brought back." Then he said, "If you follow I will get you back your sheep, load up all your karias and bring them close in." Then Allegheri followed us. Then they said, " We will look for the Mullah with you. Afterwards we loaded up and came to Bohotle. The askaris who were sick were left behind at Bohotle, and then we left Bohotle. We halted at Wudwud and afterwards sent out illalos from Wudwud They said, " The Mullah is far off." Then we started and marched for five nights and five days. On the next day we met the Mullah's force. Then we fought, 15 askaris were killed, and the Sirkal who talks Arabic. Dickinson sahib was struck with a bullet, he was struck in the thigh. Twenty-five askaris were struck with bullets, but not killed. Then we found no water and came back. We were afraid, if the askaris have no water they will die. We spent fifteen days marching to Berbera. When we came here the askaris were given many camels. Every havildar was given 3, every jemadar 4, milk camels. The askaris received a month's leave.

*A Grammar Of The Somali language*

BY J. W. C. KIRK, B.A.,

KING'S COLLEGE, CAMBRIDGE,

LIEUTENANT, DUKE OF CORNWALL'S LIGHT INFANTRY,

AND 6TH (SOMALILAND) BATTALION, KING'S AFRICAN RIFLES 1905.

Farta af Somalia asalkeedii inay European ku isku dayeen inay ku qoraan xarfaha **Latiin** ka ugu yaraan 100 sanadood ka hor 1974kii waa "undisputed fact". Waxay somalidu soo kordhisay waa hagaajin iyo sixid , sixidaasna inu Muuse Galaal kaalin qeyb libaax ka qaatay waa hubaal lana barbar dhigin Karin qolyahan Daaroodismku dabada ka soo riixayo oo waxaba inagu filan markhaatiyaashii Europe sida:

*Prof B.W. Anderzejewski " Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal: a founding father of written Somali" Horn Of Africa ,No.2, Vol 4.*

**And**

*Lee Nichols. Conversation with African writers , VOA Washington, D.C, 1981.*

Kolay arintan u suurto gali mayso Aw Jaamac Cumar Ciise iyo Jaale Axmed Idaajaa , se waa hubaal inay dhowr jeer isa soo maqiiqi doonaan oo indho sarcaad xaqiiqada isku tijaabin doonaan inay jiidhaan, waxa se kuwaas ka daran qolyaha beenta ka maala oo ayagu dhag la qabto lahayn oo la wada moodo umad warshad lagu abuuray oo mid kaste ka buuxdo intu ka maqlay labada Dajaal.

Jaale Idaajaa maaha nin is qariya oo anshax xumada Daaroodismku waa nin dacyda mar kaste ka saarantay , waxase

ka daran abriska duqa iska dhiga ee Aw Jaamac Cumar Ciise oo isagu yahay ninka udubka u aslay propaganda Daarood 30kii sanadood ee u danbeeyay suntana si maldahan u tufa, af soomaaligu adeegsadana ka wada daba qaateen ,inkastoo jilibka Aw Jaamac ee Hayaag iyo nimanka Tuur-yar la yidhaahdo oo 50kii sanadood ee u danbeeyay lagu talaalay abtirisga Dhulbahnate oo midna sal ku lahayn kolay Aw Jaamac maanta baasaboorkii Daaroodism iyo dheeraad ba shaqaysay.

Sanadkii 2005 ayaa shir lagu qabtay USA oo lagaga hadlayay arinta Heyb-sooca waxa la casuumay Idaajaa iyo Sin-gub, idaajaa ayaa hadalkiisii wuxu ku bilaabay " Waqooyiga dadka Madhibaanka ah xaafadahay dagaan waxa loo bixiyay Hargaysa Daami, Burcana waxa loo bixiyay Urayso" Isagoo sidiisii Isaaqa si gaar ah u abaaraya, nin madasha fidhiyay Oo jufada Idaajaana si fiican u yaqaan siday ula dhaqamaan gabooyaa ayaa wuxu safka danbe isagoo fadhiya yidhi " **Idaajaayow maxaad uga reebtay Habar Yacquub** ".

Habar Yacquub waa jilib ahaan jiray Madhibaan sida jilibka Tuur-yar ee Dhulbahnate qarameeyay 1970 ayay Mareexaankuna u qarameeyeen oo ku dareen abtirsigooda Daarood.

Waxa taas ka daran mar Jaale Idaajaa isagoo sidii caadadu ahayd reerka Isaaq ugu dhuumnaya taariikhii hore sida barnaamij laga diyaariyay Balaayo-Cas ayaa isagoon wax badanba ka taaban taariikhda Balaay-Cas ayaa wuxu isla goobtii Radio Muqdisho ka soo daayay wuxu ku tilmaamay gabay amaan ah oo "**nin reer Hargaysa ah tiriyay**" (waa sidu hadalada u dhigo marku umada qabiilkoda sheegayo)" uDuke Ingiriis ah oo 1956kii Hargaysa yimi , baraanburkii Idaajaa abuuray waxa ka mid ahaa eryada :

Sidii habar dhali weyday  
Oo eebo ka dhaxal reebay  
Ingiriis Dhallaanow  
Halkeenu kaa dhunkanaa.

Markii beentii fakatay ayaa la waydiiyay Jaale Idaajaa inu bal sheego ninkaas barnaaburka xun magaciisa ilay dadku ways wada yaqaane, Idaajaa oo og xaqiiqada iyo asalka baraanburkan cidii samaysay wuu ka gaabsaday oo hadal wuxu ku soo gooyay "**wuxu ahaa uun nin reer Hargaysa ah**".

Hal qoraal laguma soo koobi karo taariikhii Somaliyeed eey ka siniaysteen labada Jaale waa Idaajaa iyo Aw Jaamac ee dawladii Maxamed Siyaad Bare u sahashay maadama Akaadmiyadaa taariikhda ilaa Radio Muqdisho ilaa buugaagta taariikhda somaliyeed mariinka la soo mariyo u sareeyeen labadaas shakhsi, buug aanay ayaga tolkood lagu qurxnayn reeraa kale na lagu xagxaganayn lama soo dayn jirin. Bugaagta xarumaha Daaroodismka ka soo baxay 1974kii wuxu ka danbeeyay , dhamaanba iskuuladii Jamhuuriyada Somaliyeed wixii suugaan lagu dhigi jiray waxa ku dheehnaa weedhaha iyo farta labadaas Jaale, meelaha qaarkoodna waxa ka muuqata waxyaabo caruurto ku qososho, tusaale,

Gabayaagii Faarax Nuur oo geedku faraskiisii Asraar kaga hoos gabay jiray ilaa 1980gii ku yaalay Hargaysa ayaa hadana xarumihii Daaroodismka bugaagtay qoreen ee fasalada sugaanta secondaryga lagu dhigi jiray waxa ku taalay **“Faarax Nuur oo ahaa nin reer Burco ah dhashayna 1856” faarax Nuur nin reer Burco ahna ma ahayn , 1856kiina ma dhallan** . Xuseen Xasan rooble Guuleed (1848-1899) oo ka mid ahaa hal-aburadii maansada soomaaliyeedba u bixiyay eriga **“Suugaan”** waxay kaga soo dareen “nin bari Berbera lagu xidhay” ka dibna afar lay caruurta looga dhigi jiray, halka xataa Daaroodkii baraanburi jiray bog kaste laba kaga jireen. Aw Jaamac Cumar Ciise diiwaankiisa Ina Cabdulle Xasan gabay kaste oo af xumo ahaa wuu ku soo diray , sida gabayga u ku caayayo Isaaqa iyo Cali Jaamac Haabiil oo wax yaabo qosol ah oon qof weyni ku gabayn ku soo daray sida :

### **Waa nimanka hooyadood odhan habartu wey dhuustay**

Garan maayo anigu nin hooyadii waxaas u sheega , malaa ina Cabdulle Xasan islaanta dhashay wuu u sheegi jiray. Isagoo waxaas oo kale ku soo daray diiwaanka maansada ina Cabdulle Xasan hadana Aw Jaamac marna jawaabii Cali Jaamac Haabiil inkastoon Isaaqu gabayada ku cayatmin hadana kuma soo darin jawaabii Cali marku ka yaabay ninku halku ka eegay :

### **Huluq dheeridayda iyo siduu ku arkay hoostayda Ma haweenadii ii dhaxaa haatan lala yaabye**

Jaamacada **Indiana University** ayaa laga wada helayaa ayagoo Online ah bugaagtii Fasalada Suugaanta Kacaankii Daaroodism ardayda somaliyeed bari jiray 15kii sanadood ee Af-somaliigu qornaa (1974-1990). Buugaagtaas dhamaantood waxa ka buux si xad dhaaf ah shakhsiyaad Daarood ah Wiil-waal, Ina Carro, wiilkii Ismaaciil Mire iyo Raage Ugaas.

Maqaalkan 2aad hadaan dluucdiisa u daadago wuxu ku saabsanyay program 61naad ee Jaale Idaajaa ee idaacada VOA , barnaamijkan **61naad** iyo kii 58naad waxa u dhaxeeyay ilaa 3 program oo Idaajaa reerkiisa kaga sheekaynayo waxan dhagahayga soo jiiday sidu Jaale Idaajaa isagoo gabayadii dhibane-Cali Dhuux u tiriyay Ina Carro iyo Daraawiish, Jaale Idaajaa mar kaste gabayada Cali Dhuux ka dhigaya wax kaftan reereed ah oo iska ah **“ all within the family”** isla programka Cali Dhuux Jaale Idaajaa hordhaca wuxu ku sheegay inay Daraawiishtu reerkii Cali Dhuux ka dhigeen wax ay ku dilaan **“wuu xujoobay”** iyo wax ay **“dabada-u-xaydaan oo jeedal kala daalaan”** waa sidu isago afkiisa ka sheegay, isagoo intaas yidhi ayuu misne odhanayaa Cali Dhuux sumacada ayuu ka dilayay Ina Carro ee waxaasi waxba kamay jirin, waxa is weydiin le 20kii gabayaa ee waagaas noolaa oo dhan miyay ka wada been abuurayeen Ina Carro oo ina Carro tiisa ayuun baa qumanayd.

Dheeldheelka Idaajaa iyo Aw Jaamac u tiriyaan gabayada ku lidka ah Daraawiishta markay yihiin gabayo nin Daarood waxa waajib ah in la barbardhigo siday afka ugu xunbeeyaan markay tirinayaan gabayadu Cali Jaamac Haabiil , Salaan , Saalax Maxamed iyo Dirir Warsame u tiriyeen Daraawiishta, tusaale Aw Jaamac oo kale wuxu yidhaahdaa

Cali Jaamac Haabiil Ingiriiska ayaa mushahaar siin jiray oo u shaqayn jiray , Aw Jaamac waxa haboon in la weydiiyo gabayaday Daaroodku ku caayi jireen Daraawiishta ma bilaash bay ugu shaqayn jireen Ingiriiska mise tabaruc ayay kuwa Daarood ahaayeen

Barnaamijki ugu danbeeyay 61naad wuxu Idaajaa soo qaatay dhacdadii la magac baxday Dhulmadoobe ama Rugga , waxay ahaa dhac iyo boob 1913kii doxtadaii Daraawiishta u gaysteen reer miyi ka dhawaa xaramahooda. Dadka aan taariikhda Daraawiishta si waafi ah u hayn waxa waajib ah inay ogaadeen in 1905kii wixii ka danbeeyay aanay jirin Gaalo ku sheeg lala dagaalamo ee Daraawiish iyo Talyaani iyo Ingiriis heshiisyeen , Daraawiishna heshiis Muxamiyadeed la saxeexdeen Talyaaniga oo la dajiyay Majeerteenia Garoowe ilaa xeebta Gar-cad iyo Eyl. Si ujeedada qoraalka iyo airnta laysku hayo loo fahmo waa lagama maarmaan in xoogaa ku saabsan dagaaladii bilowga ahaa ee dadka lagu qaldo in si fiican loo fahmo si looga sooco 14kii sanadood ee ka danbeeyay 1905kii oo hal goob isticmaal iyo Daraawiish isku arkin. Waxan isku tijaabinayaa labadaas nin taariikhahay kufsadeen sedex arimood oo had iyo jeer ku Mahdiyaaan reerkooda reerka Isaaqana ku qaloociyaan inaan siday ahaayeen u sheego anigoo weliba adeegsanaya wuxu isticmaarku ka qoray labada reer ba.

### **Asaaskii Daraawiishta iyo Hogaankeedii sare 1895-1905 PartII.**

Mudadadii dagaaladu socodeen 1900-1904kii waxa taariikhda Daraawiishta loo adeegsadaaba waa qabaaalka Daraawiish galay iyo kuwa diiday, arintaas oo Aw Jaamac Cumar Ciise badanaa reerkiisa ku mahadiyo , kan Idaajaa isago waa iska doc-ka-yeedh oo Marexaanku ka dhashay wax Daraawiish kaga jiray oo magic le ma jiraan ee Daaroodnimo ayuu baa shidaysa. Hadaba ma Aw Jaamac 12ka Dhulbahnate buugisa ka qoray baa run sheegaya marku leeway “Dhulbahnate ayuun baa Daraawiish ahaa” mise Ingiriiskii goob joog ahaa ee dawlada ahaa!! Ingiriis qabaaalka Daraawiish ka dagaalamayay 4tii sanadood ee dagaalku socoday sidatan ayuu u dhigay:

*The Habr Awal and Habr Garhajis except the Musa ismail, always rejected his advances , while the Habr Toljaala, always a trubulent tribe, and the Dolbahanta were his only active supporters in British territory. Of the former the Adan Madoba were not only responsible for supplying him with arms , but also assisted him on all his raids. The reer Yuusuf and ahmed Farah, like the Musa Is, were with the Mullah in 1900. The Dolbahanta, all except the south-eastern portion, made submission to the British force in 1901.*

*Since the conclusion of the operation in 1904, a number of Ali Gheri and Kayat refugees from the Mullah have sought our protection , and have been provided with live-stock and arms and located in posts on the frontier , the Ali Gheri at bohotle and the Kayat at Eil Dab.*

*In Abyssinian Somaliland the Mukabil Ogaden originally supported the mullah ,*

*especially the Ibrahim subtribe which made submission to the British force at Bohotle and Kurmis in 1901. The Miyirwalal or western Ogaden embittered against the Abyssinians owing to frequent raids, accepted the Mullah in 1900, but apparently did not actively supported him.*

*The Adonis in the south are numerous, but are said to be unwarlike. They have however , on more than one occasion fought in the Dervish ranks and are well disposed towards the mullah.*

*In Italian Somaliland, during Swayne's operations, the Mijjarten, except Yusuf Ali's following , supported the Mullah and many Mijjarten fell in his ranks at Samala and Firdhidin, but in 1903-1904 they were at least professedly opposed to him. The Hawiye and Marehan, who are under Yusuf Ali, suffered heavily from the Mullah's raids and were forced to join him. These last are not warlike, though comparatively numerous.*

*Qabaabilka Daraawiishta ciidanka u ahaa 1900-1904 waa sidatan sidu Ingiriisku u sheegay:*

*1- Habar Jeclada waxa kaga biiray , Axmed Faarax , reer Yuusuf iyo Adan Madoobe oo u badnaa, hogaaminayay Xaaji Suudi.*

*2- Habar Yoonista waxa kaga biiray H.Y bari oo Muuse Ismailia u badanaa hogaaminayayna Suldaan Nuur.*

*3- Dhulbahnataa waxa kaga biiray Cali Geri iyo markii hore Mahamoud Garaad ka dib dagaaladii ugu horeeyay Maxamud Garaad wuxu ka soo jeeday dhanka Ingiriiska gaar ahaan dagaalkii Firdhidin.*

*4- Majeerteenka waxa kaga biiray wax aan ahayn qolada saldanada haysata ee Cismaan Maxamuud , inta kale way ka qeyb qaataan dagaaladii hor dhaca ahaa gaar ahaan Firdhidin.*

*5- qabiilka Jareer weynta ah (Adonis) , iyo Hawiye iyo Mareexaan.*

*6- Ogaadeenka waxa kaga biiray Ba-Xawaadle ( Gunde-Gooye ka hor ) iyo Abraahim oo Makaahiil ah.*

*Qabaaalkaas midba mar ayuu dagaalada ka qeyb qaatay marna ka baxeen marna ku soo laabteen , qabiil si joogta ah ugu jiray Daraawiish ma jirin , nimanka la buunbuuniyo ee Cali Geri wiixi aan ahayn 4ta abtiyaashii ee ilma Seed Magan mooyaane Cali Geri qabiil ahaan wixii ka danbeeyay dagaalkii ugu horeeyay kumay jirin oo way ka baxeen , ayagoo qaxoontiya oo la qaxiyay ayay Ingiriiska u galeen ka dibna hub ayaa loo qeybiyay ay dhulkooda kaga ilaaliyaan Daraawiishta , wixii ka danbeeyay 1904 Cali Geri shaqo kuma lahayn Daraawiishta , shakhsiyaad se waa kaga jireen oo Aw Jaamac Cumar ciise magacyadoodii diiwaan galiyay sidu u buunbuuniyo oo ka dhigo in qabiilka oo dhan ay meesha ku jireen , Cali Geri haduu Daraawiish wada galay , Darawiish Majeerteenia ayay u wada guarantee ma Cali Geri oo dhan*



*baa ka daba guuray oo dagay xeebta Ilig iyo Eyl.?*

***“Since the conclusion of the operation in 1904, a number of Ali Gheri and Kayat refugees from the Mullah have sought our protection , and have been provided with live-stock and arms and located in posts on the frontier , the Ali Gheri at bohotle and the Kayat at Eil Dab.”***

Wuxu malmaluuqay Aw Jaamac Cumar Ciise waagii Kacaankii Afweyne hadii la barbardhigo qoraalada Ingiriisku ka qoray qabiiladii Daraawiish u dagaalamayay iyo shakhsiyaadkii hogaaminayay wuxu ogaanayaa heerku Aw Jaamac Cumar Ciise reerkisa Dhulbahnate Daraawiishtaba ugu talaalay ilaa ilaalo yar oo dhiboo ah ayaa lagaaga dhigayaa nin faraa lagaga gubtay. Aw Jaamac waxa dhulbahnate ah ee buugiisa ka buuxa midna dawladii Ingiriisku uma aqoonsanayn inu wax ka ahaa Daraawiishta , meeshu magacyadan ka keenay waa in isaga loo raaco iyo 12kii Qurjiile ee u waxan ka soo ururiyay.

Waxa waajib ah in qoraalkan aan ku eekaado waxa cadayn loo hayo , meel kaste oon xaqiiqo iska indho tireen labada Jaale aan ku sheegayo waxan daba dhigayaa daliil si shakhsiga wax dheeraad ah u baahan isagu baadho buugaagtaas ka dibna isagu go'aankiisa shakhsi gaadho oo aniga iyo labada Jaale ba daliiladaas isagoo cuskanaya ka runta sheegaya isago tilmaanto.

***In Major Hunter's personal opinion the attack on the Berbera live stock by Sultan Nur was instigated by Duali Idris***



**Ducaale Idriis waxa igu maqal ah inu Wasiir Xuseen Cali Ducaale yidhaahdo waa awowgay se ma hubo.**

### **Dariiqooyinkii dalka ka jiray Qaadiiriya, Axmediya iyo Saalxiyada.**

Dadka somalidu wixii ka horeeyay 1980gii oo salafiyadu soo gashay iyo maanta oo ay Wahaabiyadu qabsatayba Somalia ka hor somalidu waxay ahaan jireen umad Suufiyada ka mid ah , Somali kaliya maahee Yemen ilaa Harar iyo bariga Afrikaba Suufiyada ayaa kaga badnayd fikradaa kale ee Islaamka. Dariiqooyinkaas waxa ugu d'a weynaa Dariiqada Qaadiiriya oo dada Somalida ah soo gaadhay qarnigii 14naad wakhtigii Axmed Guray , waxa la sheegay in dariiqada Qaadiiriya oo loogu magac daray (Sheekh Cabdiqaadir Al-Jaylaani oo Iraan ku aasan kana mid ah All-al-Beyt) in dhulka Yemen

Somalia uka keeneen niman reer Ba-Calawi ah.

Dariiqada Axmediya oo loogu magac daray asaasiheedii Sayid Axmed Al-Faasi oo ah nin Maghribiya waxa qoran inu Somaliland ergo u soo diray 1870 Dariiqadiisa ka dhex bilowda Somalia , dariiqadaas saldhigeedu wuxu ahaa Makka , Axmed Al-Faasina wuxu ahaa Sanuusi, khanate ku dagaalama magaca Al-Sanuusiya waxa ugu danbeeyay Cumar al-Mukhtaar

**The Somalis are Sunni Mohammedans and originally belonged, as do many of them still, to the Kadariyeh sect. About 1870, however, an Arab Sheikh, Seyyid Ahmed by name, sent a representative to Somaliland, who established a *tarika* and gained many disciples. The Ahmedieh, as this sect came to be known, soon became stronger than the Kadariyeh; and a hostile feeling arose as between the two schools of thought. In 1887, however, the teaching of a certain Arab Sheikh, Mohammed Salih, penetrated from Mecca to the Somali coast and found many converts among the Ogaden and Dolbahanta. This movement split the Ahmedieh into two branches—the Anderawieh, who remained faithful to Seyyid Ahmed, and the Salihieh, which is the name given to the sect founded by Mohammed Salih. Although the Anderawieh and Salihieh do not meet together to perform *zika*, or religious ceremonies, they are on good terms and are both alike hostile to the Kadariyeh. With an Ogaden father and a Dolbahanta mother, Mohammed naturally became a disciple of Mohammed Salih, and sat at his feet during his pilgrimages to Mecca. The Salihieh are insignificant enough either at Mecca or in the Mohammedan world generally outside Somaliland ; but, at the same time, they are extremely fanatical, and their tenets are of a harsh and uncompromising order compared with the more complaisant Kadariyeh, or Anderawieh.**

Dariiqada 3xaad ee Saalxiya waa isla Axmediyada oo markii Axmed Al-Faasi dhintay sheekh Maxamed Saalax Al-Rashiidi oo isba ahaa Axmediya ayaa qoladii Somalida ahayd awal Axmediyada, ayaa wadaadkan cusub hogaan ka dhigtay karaamooyina ugu abtiriyay Axmediyadii asal ahaan dalka ka jirtay fadhigoodu ahaa Magaalada Sheekhna ka falaagoobay. Saalxiyadu meel aan ahayn Somaliland kama jirin aduunka qolyaha dariiqadaas sheegtana waxay marna sheegan jireen Axmediya marna Saalxiya ( somalidu balanced waxay isku qaldaan Axmediyada Pakistan iyo Axmediyada dalka Somali ka jirtay). Dariiqada Axmediya/Saalxiya ayadoo dalka ka jirta xarakada Al-Sanuusiya iyo Al-Mahdiyaba somalidu dagaaladooda la socdeen ayay dhalatay xarakadan al-Daraawiish ee Somaliland “ **nothing came out of a vacuum**“ Sanuusiya iyo Mahdiyinta Sudan ba labaduba Somaliland waxay ku lahaayeen taageerayaal sidu qoray “waaligii“ ugu horeeyay ee Muxamiyadu yeelato Mr Walsh:

Taariikhdi ay faafiyaan qolyahii “**kacaanku u barakaysnaa**” taabcasanaa, waxay sheekada Daraawiishta kaga bilaabi jireen Ina Cabdulle Xasan baa Berbera ka soo dagay (1895kii) oo “cashuur” la waydiiyay oo diiday, mudo ka dibna arkay ciyaal “john” iyo “david” yidhi waa nala yidhaahdaa, oo sheekada Daraawiishtu ahayd wax hal nin oo kaliya abuuray, ka dibna Dhulbahnate reerka la yidhaahdo u tagay oo dagaal hubaysan

lala galay Isticmaarkii , se waxaasi waa iska sheeko xariireed lagu buunbuuninayo Duuflaalka.

Eriga “Darwiish” waa eri asal ahaan ka soo jeeda “falsafada” Suufiyada, waa “**nin dunida ka saahiday oo Ilaahay u go’ay**” , **Darwashada** ( dhaqanka darwiishnimada) **Imaam Axmed Ibnu Taymiya** waxay ka mid ahayd wuxu ku naqdin jiray Suufiyada, Daraawiishtu aduunka meel kaste hal arin bay ka midaysanyiin laga bilaabo Turkey nimanka is wareejiya (the whirling Devrishi) ilaa kuwa Sudan gidigood waa wada Suufiyiin. Erigo qariib kuma aha aduunyada Islaamka laakiin waxa ku ugub ah Suufiyiin dagaal gasha oo dagaalanta , Suufiyintu siyaasada faraa lama galaan oo Diinta ayay u go’een.

Dhulka Somaliyeed ama Somaliland “**Ber-al-Somal**” oo ah magacan hadaba la yidhaahdo dagaanka Waqooyi, waa eri ka horeeyay Isticmaarkii Ingiriiska , 1840gii marku Ingiriisku soo dagay Cadan ayuu magacii Carabiga ahaa ee “ber-al-somal” u tarjumay afkiisa oo ku noqonaya “**the land of the Somal**” kuna soo gabaiyeen Somaliland. Somaliland ama Ber-Al-Somal eriga Daraawiish iyo dariiqada Axmediyada/Saalxiya iyo dariiqada Darandaawiya labadaas dariiqadoodba dhulka Somali way ku cusbaayeen oo waxay yimaadeen dibqaayadii qarnigii 19naad.

Laga bilaabo qarnigii 14naad ( 1300’s) arrayed somaliyeed aduunyada Islaamka ayay u wax barasho tagi jireen ka dibna waxay ku soo laaban jireen dagaankay u dhasheen oo halkaas malcaamad ka furan jireen ku salaysan Madahab/dariiqada ay raaceen , dadkana madhabkaas ama dariiqadaas ku soo xarayn jireen. Ardaydaas somaliyeed intii ka diiwaan ashamed Azhar university “Riwaaq Al-Zaylac “ waxa bugaag qoray oo ka caan ah aduunyada Islaamka :

- 1- Cuthmaan Bin Ali Al-Zaylici (d. 1342) Fakhardiin al-Zaylici qorayna buuga “kitaab Al-Baxar Al-Raa’q : Sharx kanz al-Daqaa’iq”
- 2- Jamaaladiin Abdulllah Ibn Yuusuf )al-Xaafid Al-Zaylici( d . 1380)

Waxa ugu caansan nimankaas Cabdiraxmaan Al-Jabarti oo awowgii 4aad Zaylac ka yimi kuna soo biiray ardaydii Jamaacada Azhar, Cabdiraxmaan al-Jabarti Al-Zaylici wuxu qoray “**Taariikh Misr Fi Cahd Al-Mamaaliiks**” 1780. Siday u badantay dariiqyooinkan Axmediya/Saalxiya waxa dalka keenay uun culimadaas somaliyeed ee dibadaa u hoorayed ka dibna ku soo laabanayay allodia hooyo, waana dhaqan soo jireen ahaa , ka dibna reeraa dhex dawaafi jiray ayagoo siyaaro doon ah. Waxa la hubaa oo magaciisa la hayaa **Dariiqada Andaraawiya** oo ah farac ka mid ah Axmediyada ninkii ugu horeeyay ee keenay Somaliland, masaajidna uga dhisay Magaalada Sheekh 1870gii , iyo Dariiqada AlAweesiya oo sheekh Awees al Baraawi bilaabay ahaana ardaygii sheekh Cabdiraxmaan Al-zaylici oo asal ahaan ka soo jeeda reeraa Jareerweyn , waxa kaloo la hubaa inay Dariiqada Saalaxiyad oo ayaduna ahayd farac kale oo isla Axmediyada ka mid ahayd inay ka horaysay Ina Cabdulle Xasan, waxa kaloo la hubaa dhulka somaliyeed wakhtiigi Ingiriiska iyo ka hor ba inay wadaado Sudaan iyo Waqooyi Afrika ka yimi inay soo dhex

Markaas arinku waa ka gun-dheeryay wadaad reer Buhoodle ah oo cashuur diiday , si

kasteba ha ahaatee Daraawiishta somaliyeed waxa lagaga dhawaaqay markii ugu horaysay burco 1898kii oo reeraa jiidaas iska soo gaadha Habar Yoonis/Habar Jecllo iyo Dhulbahnate ku wada biireen Daraawiishta shirweyne Burco ka dhacay sanadkaas. Waxa kaliya ee laga garan karaa daraawiishta cidii ku dhawaaqaday ama asaastay nimankii wakhtigaas Ingiriisku ku tuhunsanaa hogaanka Daraawiishta oo u wada daliishaday Hayes-Sadler waana 5ta nin ee wakhtigaas u sareeyay Daraawiishta 1898-1905, shantaas nin waxa dheeraad ahaa Cabdulaahi Shixiri oo dibada u joogay.

***In the unlikely event of the Mullah offering to surrender , in his case and that of the following: Ahmed Warsame (known as Haji Sudi) Deria Araale , Deria Gure Only an unconditional surrender should be accepted , no gurantee of any kind as to future treatment being given. Sultan Nuur the late sultan of the Habar Yunis, may be guaraunteed his life" J. Hayes-Sadler, His Britannic Majesty's Consul-General, Somali Coast Protectorate. Aden April 30th, 1901***

Sedexdii sanadood ee ugu horeeyay 1901-1904 ayuun bay Daraawiish iyo Ingiriis dagaalameen, dagaalkii u horeeyay ee Ingiriis iyo Daraawiish dhex mara wuxu ahaa dagaalkii **Jun 2<sup>nd</sup> July 16 1901** dagaaladaas oo ahaa laba goobood , **Sacmala June 2<sup>nd</sup> iyo Firdhidin July 16**. Ka hor dagaaladaas ugu ayuu **Hays Saddler Her Majesty's Consul-General, Somali Coast Protecorate** oo ahaa sarkaallka Cadan ka maamulayay xeebaa Somaliyeed (Zaylac-Laasqori) ee Ingiriisku heshiis kula galay qabaaalka somaliyeed amar uga soo dirayaa ninka hogaaminayay ciidamada Ingiriis oo la odhan Swayn somalidu u taqaanay Swayn Cawar. Hays Saddler wuxu soo faray ciidankiisa habkay ula dhaqmi lahaayeen hogaanka Daraawiishta isagoo ku adkaynaya Sawayn Cawar in 4ta hore waa **Ina Cabdulle Xasan 1865-1921** (Ina Carro) , Axmed Warsame (Xaaji Suudi) **1856-1920** Diiriye Caraale (**wax taariikh ah oo ninkaas loo raaco aan ahayn magaciisa iyo jilibkiisa oo Ingiriisku ku sheegay Adan-Madoobe mooyaane weli maan helin wax tafaasiil dheeraad ah** ) Iyo Diiriye Guure 4taas nin xataa noloshooda inaan loogu balan qaadin in la damiinto hadii la qabto, **Suldaan Nuur Axmed Amaan 1837-1906** oo ah suldaanka H.Y kaliya noloshiisa (inaan la daldalayn) hadii la qabto haloo damiinto bas.

5taas nin ee Hogaanka Daraawiishta wakhtiyadii dagaaladu socodeen u sareeyay xarakada daraawiishta hal nin oo ahaa **Ina Cabdulle Xasan** ayuun baa reerka Jaale Aw Jaamac iyo Jaale Idaajaa ka ahaa, 4ta kale , labada Diiriye, Xaaji Suudi ( kana soo shaqeeyay Suudaan wakhtii Maxamed al-Mahdi lala dagaalamayay, waa ninku Ingiriisku sheegay inu magaca “daraawiish” iyo duubka iyo astaamii sudaanta ku soo kordhiyay xarakada , 20 sanadoodna hayay hogaanka Abaanduulmimada Daraawiish 1920 lagu dilayna dagaalkii ka dhacay qalacada Taleex ilinkeeda isaga iyo Darwiish Ibrahim Buqul):

### **Maxamed Cabdulle Xasan Nuur hogamiyaa Daraawiishta 1896-1921**

Taariikhda ina Cabdulle Xasan ka sokow meeshu ku dhashay oo ah dagaankan maanta Buhoodle barbaarintiisi hore waxba kama duwanayn jiilkii lodkisa ahaa , Wadaadku wuxu dhashay 1860's badhtamahiisii ama se dhamaadkiisii, noloshiisii caruurnimo wuxu

Qoraaladii Kacaanku ku xardhay taariikhda **Wadaadka Waalan**, waxa laga bilaabaa aabihii Cabdulle Xasan Nuur oo Dhulbahantaa soo dhex dagay, ma cada arintaas inu aabihii oo Ba-Geri ah inu daganaa jiida Kiridh ee Buhoodle. Waxay odayaasha Ba-Geri 1960 iyo 1970 laga soo gaadhay in islaanta dhashay ina Cabdulle Xasan safar u raacday dhankaas iyo Ba-Geri. Ka dibna wiilkan isagoo dhowr jir ah ula timi reerka Faaraax Garaad. Ma cada intay wada qoys ahaayeen Carro Seed Magan iyo Cabdulle Xasan Nuur. Waxa dagaanka Taleex ku yaal laba daarood oo gaagaaban oo Aw Jaamac yidhaahdo waxa ku aasan Carro iyo Cabdulle Xasan , se arintaas waxba kama jiraan, odayaasha Ba-Geri ee taariikhda Ina Cabdulle Xasan ku xil dheer ka hor intaanu kacaanku afduubin waxa laga hayaa inaanu Cabdulle Xasan sooba gaadhin xarakadii Daraawiishta.

Waa hagaage, sidee bay markaas xabaasha/qudbiga Cabdulle Xasan ugu yaalaa maanta degmada Taleex, Taleex waxa la dhisay 1913kii , meelna taariikhda Daraawiishta ku maqli maysid Cabdulle Xasan oo nolol ahaan ku soo gaadhay bilowgii Daraawiishta. Waxa hubaal ah inaanu Cabdulle Xasan dagaanka Dhulbahnate iman oo Carro Seed isku qabeen dagaanka Ba-Geri, oo ayadoo Heeran ah sidaas ugu gashay wadaadka Cabdulle Xasan, ka dibna sidaas lagu kala tagay, oo ayadu ku soo laabtay dagaankeeda.

Carro Seed Magan sida taariikhda la qariyo lagu hayo waagii Daraawiishta waxay u dhaxday nin Muuse Ismailia (reer Xaamud) ah oo la odhan jiray “**Dhalo-Mudhe**” wuxu canastas kula baxay wuxu ahaa nin aad u laxaad dheer, waxa sheekooyin lagu hayaa inaanay Mudhe iyo ina Cabdulle Xasan isku fiicnayn oo markii Taleex laga guurayay loo guurayay dagaanka Muuse Ismaaciil ee Jiidali iyo Midhisho in faras la jiidsiyay ninka Mudhe oo boqonta ka jabay , Caro Seed Magan iyo isagoo dhaawac ahna ku hadheen Taleex. Qabaaikii ay is hayeen Daraawiishta waxay odayaashoodu odhan jireen Carro Seed Magan ayadoo gabowday oo d’ ah bay “**Sabeenowday**” ka dibna Dhalmo-Mudhe sidaas ugu dhaxday. Ninka Dhalmo-Mudho waxa lagu xaman jiray nin laayaan ah , “**dhilonimada mooyee, walee Dhalmo-Mudhe rag buu dhalay**” waa hadaladii lagu hal qabsan jiray marka la soo hadal qaado magaciisa, waxana loogu abtiriyaa ina Cabdulle Xasan weedhaas.

Jaale Aw Cumar Ciise khuraafaadkisa waxa ka mid ah Wadaadku marku Berbera yimi Cashuur inu bixiyo ayuu diiday , waase iska khuraafdkii iyo buunbuunintiisa , waxa ka mid ah karaamadaa u Aw Jaamac ku someday Wadaadka inu magaca ka shaabho Nabi Maxamed , Isniina dhashay iyo bahaabaahaa noocaas ah.

Wadaadku marku Berbera yimi 1892gii wuxu dhibaata ah ma gaysan se waalida waxa loogu bixiyay waxaaybu odhan jiray waa xaaraan, ay ka mid tahay “shaaha” , iyo “badhida” oo Somalida reer miyigu cabi jireen. Wax camal ah ma lahayn marku Berbera joogay oo wuxu ku noola “dawarsi” ama sadaqaday wadaada somalidu siin jirtay “alms“. Dariiqada Saalxiyada oo farac ka mid ah Axmediyada ayuu ina Cabdulle Xasan fidin jiray falsified hogaanka Qaadiriyada doodo ku dhex mareen Berbera Sheekh Ismaaciil Isxaaq iyo sheekh Madar iyo Cabdilaahi Caruus oo qaar ka mid ah nimankaasi ay ahaayeenba macalimiintiisi.

**From time to time he corresponded with the Vice-Consul at Berbera about tribal matters, and occasionally he would send down as prisoners to the Vice-Consular Court Somalis who had been guilty of criminal offences in the interior. Thus, he acquired very considerable influence over the tribesmen by adjusting their grievances and ensuring that his decisions were put into effect; for the Somalis were not slow to realise that his rough and ready justice was preferable to the long journey to Berbera and the prospect of the Government not being in a position to enforce its decision in the interior, when given.**

Ina Cabdulle Xasan maamulkii Ingiriiska ee Berbera xidhiidh fiican baa ka dhaxeeyay oo dhanka arimaa reeraa waa kala shaqayn jiray ilaa marku Berbera ka guuray ee u dhex dagay reer abtiyaashi dagaanka Buhoodle, halkaas lafteeda nimanka doonan ee danbi lagu hayo Ina Cabdulle Xasan xeebta Berbera iyo maamulka Ingiriiska ayuu u soo gacan galin jiray.

1899kii markii H.J da (Maxamed Abokor) iyo Habar Yoonista Burco ku biireen saalixiyada oo markaas gobolka Togdheer qabaalka Dagan ku biireen ayaa ayagoo tiro ilaa 5000 oo Ciidan ah Burco iskugu yimaadeen.

**The Mullah, paramount among the Dolbahanta, was making overtures with varying success to the Habr Toljaala and Habr Yunis tribes, with a view to extending his authority towards the central area of the Protectorate. In August, 1899, with a force of 5,000 men, of whom 1,500 were mounted and 200 armed with modern rifles, he arrived at Burao, a position of considerable strategical importance, commanding as it does the dry season water supply of the Habr Yunis, Habr Toljaala, and Dolbahanta.**

Shirweynii Burco oo ay iskugu yimaaden 3 qabiila ee hadaba daga dagaanka Togdheer waxay ku dhawaaqeen Jihaad lala galo gaalada. Waxay qolyaha Jaalee Daarood ka dhigaan arintan duulaan la qabsaday Burco , ee wax dagaal ah kama dhicin Ina Cabdulle Xasan iyo wuxu watayba waxa Burco ku soo dhaweeyay Suldaan Nuur oo markaas fadhigiisu ahaa jiidaas. Dagaaladii ugu horeeyay waxa lagu qaaday Habar Yoonista Oodweyne oo ayagu Suldaan Nuur col ahaayeen kana raacay suldaan Madar Xirsi. Kii ku xigayna waxa lagu qaaday fadhiga Dariiqada Qaadirayada ku lahayd Magaalada Sheekh oo Axmediyadu kaba bilaabmatay se ay la col ahaayeen Qaadriyada. Qabaalkii ciidanka Daraawiishta ee markaas Burco isugu yimi waxay kala ahaayeen , **Adan Madoobe, reer Yuusuf, Axmed Faarax, Muuse Ismaaciil, Cali Geri, Abraahim, Ba-Xawaadle** , nimankii hogaanka Daraawiishta u sareeyay wakhtigaas intii magacyadoodu Ingiriisku sheegay waa Madawaska , Xaaji Suudi iyo Suldaan Nuur:

**“In 1895 after which he returned to his tariga , Kob Fardod, in the Dolbahanta. Here he guardly acquired influence by stopping inter-tribal warfare, and eventually started a religious movement in which the Rer Ibrahim (Mukabil Ogaden) Ba Hawadle (Miyirwalal Ogaden) and the Ali Gheri (Dolbahanta) were the first to join. His emissaries also soon succeeded in winning over the Aden Madoba, notable amongst whom was Haji Sudi, his trusted lieutenant, and Ahmed Farih and**

reer Yuusuf , all Habr Toljaala, and the Musa Ismail of the Eatsern Habr Yunis , Habr Gerhajis with Sultan Nur.”

## Page 49 official History of the Operation

### Darwiish Xaaji Suudi abaandullii ciidamada Daraawishta 1896-1920.

Waxa hubaal ah hadii canaasiirta Daaroodismku madax maray ka daayaan qabyaalada iyo cuqdada taariikhda xarakada Daraawishta in ninka ugu magaca dheer taariikhda Daraawishta noqonayo muran l'aan Xaaji Suudi, 1850's-1920 ka sokow bilowgii Daraawishta o u ku jiray waxa u dheer inu isago magaca , astaanka iyo nimaadkii Mahdiyinta isagu ku soo kordhiyay Daraawishta Ingiiriskuna uga markhaati ahaa.

**“His purely political adherents were almost solely confined to a few *degornmes* and disgruntled Somalis residing in Aden, who cherished some personal grudge against the British Government. Typical of these was Haji Sudi, an ex-interpreter of the Royal Navy, who had been at Suakin and was conversant with Dervish customs, many of which he imported into Somaliland. For one and twenty years he was the Mullah's trusty lieutenant, and was killed in action near Tale on the 5th February, 1920, during the final expedition.” page 49-50.**

Xaaji Suudi ka sokow astaanka iyo magaca daraawishta uu kala yimi Sudaan wakhtigu joogay Suakin oo ahayd goobtii Mahadiyiintii ku jabeen , wuxu khibrad dheeraad ah u lahaa siyaasadaa aduunku halakay kala maryaan , Af-Carabi, Ingiriisi iyo Sawaaxilba wuu ku hadli jiray , qoriga darandooriga u dhaca ee somalidu u taqaan Gildhigaan wuxu ahaa ninka kaliya ee yaqaanay habka loo xidho qoriga.

Xaaji Suudi dagaalkii ugu horeeyay ee Fardhidin ilaa dagaalkii ugu danbeeyay ee duqaynta qalcadaa Midhisho iyo Taleex iyo dhacdo kaste oo Daraawishta taariikhdooda kaalin kaga jirtay sidii dagaalkii Daraawishta hexode ka dilaacay Ilig ee lagu kala jabay (Canjeel Talo-Waa) markii reero Hartida ka mid ah la baxeen xoolii iyo saanadii Daraawishta Xaaji Suudi ayaa 1908kii ka daba duulay oo saanadii iyo hubkii Daraawishta ka soo celiyay. (Suudiyow sedkaa waa jannee samaca kalaamkayga , Sala-Alla la yiilyow adaan saajic ku ahaaye) Gabaygii Can-Jeel-Talo-Waa

Geel-qaadkii geela Dhulbahnate lagu qaaday Koofilna lagu dilay 1913kii Xaaji Suudi wuxu ka mid ahaa maqadimiintii ayaantii Koofil ku dhintay aaga Caynaba. 1970-1990 ayay ku qaadatay dawladii Jaale Daarood inay Xaaji Suudi ku badasho wiil kuray ah oo meel iyo kaalin u kaga jiray Daraawishta la aqoon wax aan ahayn 1 gabay oo geelii Koofil dhicanyay ahayn iyo ilaa 3 gabay oo waagii Daraawishta ka danbeeyay u kaga calaacalayay makhaayad waab ah u ka furtay Buhoodle.

Sanadkii dayruuadaa weerarkii ugu horeeyay ee qalcada Midhisho (waxa Midhsiho iyo Jidali keenay niman Muuse Ismaaciil ah u watay Darwiish Cabdi Dheere) Ina Cabdulle Xasan iyo juhalaadii la socoday dayaarada waxay u qaateen shinbir-malaaigeed , ka dibna ina Cabdulle Xasan wuu hoos cararay dayaaradii isagaa la sheekaysanaya oo le waa “awaliya Ilaahay ii soo diray” Xaaji Suudi oo goobta joogay ayaa markiiba yidhi waar



waa dayaarad , se yaa u garan “dayaarad” markii dayaaradii soo rogaal celisay Ina Cabdulle Xasana gaalkii waday ku beegay miinii ayuu ku sii daayay , nasiib waxba kuma noon dharkii ayuun baa ka gobtay , waxay se la he shay Caamir oo ku dhintay goobtaas, Caamir wuxu ka mid ahaa sedex nin oo Khsuusi ah oo Midhisho iyo Taleex ku dhintay. Xaaji Suudi waxa lagu dilay qalcada Taleex Februray 1920 isaga iyo Ibraahim Buqul siday soo wariyeen hogaamiyaashii ciidamada Ingiriiska D.C Of Zeila Henry Rayne.

Ninka taariikhdiisu ilaa Mahdiyintii sudaan soo taxnayd ilaa 1920 Aw Jaamac Cumar Ciise oo Daaroodismku ku fogaaday buugisii Kacaankii Maxamed Afweyne qandaraaska ku siiyay wax ka yar 2 sadar ayuu kaga soo daray dhimashdii Xaaji Suudi ee qalcada Taleex isagoo ka horaysiiyay amaantii faradii qolayaa Daarood ku baxsadeen sida faraskii Shaluu-Maray oo Abshir Dhoore oo Majeerteen ah ayaantaas ku baxsaday iyo baqashii Dhibic oo ina Cabdulle Xasan oo aad u naaxay ku baxsaday, sidaas kumu dayne wuxu weliba hadalka u dhigay sidatan“ ayaantaas qalacada taleex waxa ku dhintay Xaaji Suudi rag u ku jiro iyo caruur iyo dumar fara badan” Nin ragi waa fahmayaa , doqona uma baahna ujeedada Aw Jaamac Hayaag. Waxa arintaas kaba daran wuxu buugiisa “Divine Madness” 1993, Jaalle Abdi Sheekh Abdi , dagaalkii Taleex marku ka waayay wax Daarood ah oo ku dhintay ayuu doodii wuxu Jaale Daaroodkaasi u dhigay sidatan “ Isaaq umay naxariisan Xaaji Suudi oo d’a ah ee waxay ku dileen irada qalcada Taleex horteeda” Tollow siduu ku ogaaday inu nin Isaaqi xabadaas lahaa ?? Mida kale haduuba sidaas u naxariis badanyay muxu isu weydiin waayay kan u caabudayo ee ina Cabdulle Xasan wuxu Daaroodkiisa sidaa ugu galayay 20 sanadood?

### **Suldaan Nuur Axmed Amaan asaasayaashii Daraawiishta 1898-1906.**

*Hali waa iga salaan  
Halna wa iga sacab-qaad,  
Halna wa iga suaal.  
Hal wa i sacabqaad, ,  
wa i Suldaanka amaanti,  
Siraadki Berberad,  
iyo wa haldhaa subax joga,  
baalashi kala sidoo  
wax la sisto la waa  
Halna wa iga salan.  
Geela, Seenyo iyo Laan  
Sangayaasha qararystay,  
Gabhahaa suurta la moodo  
iyo seyaxaanu ku jifna.  
Sadadaada nabad ba leh.  
Greeting to Sultan Nur on his visit to the Habr Toljala.  
1885.*

**was stripped naked and terribly chastised with a Somali whip over face, chest, and belly ; and, at last, when he fell senseless to the ground, they placed grass round him and set fire to it.**

Habeen habeenada ka mida ayaa nin Ilaalo ahaa hawshiisii ka raacay guluf Bageri ah oo duulaan ku ahaa reer Cabdile, ninkii ayuu ina Cabdulle Xasan intu yidhi soo qabta ayuu ergadiina ugu yeedhay daawashda. Ninkii inta wejia iyo beerka laga jeedleeyay ayaa marku suuxay caws iyo xaabo inta la barbar dhigay nolol lagu gubay.

Isagoo u sheekaynaya ergada ayaa wuxu yidhi , ayaantii dayaaradaaa (Midhisho) xaarkii shinbiraa waxba ma yeelin ( hubkii dayaarada) ee waxa wax kaste igaga darnaa waraaqahay soo daadiyeen waxa ku qornaa , waxan ku arkay anigoo lay bixiyay “Maxamed Cabdulle Xasan Ogaadeen Ba-Geri-reer-Xamar” naxdin weynaa, waar ma anaa Ba-Geri ah bal maw eegay reer Xamar, waa midgo, ma anaa midgaan ah , bal eega quruxdaydaya”.

**" I was troubled by the Mijjertein j and I, therefore, moved to Jidali in the hope of peace and quiet. I intended to arrive at a settlement with the British Government. But without any provocation whatever the Government attacked me. I did not mind the birds (aeroplanes). They cannot hurt me. Their droppings fell on the top of my white canopy, but could not touch me. The only thing that did hurt me was that in the Arabic letter which the aeroplanes dropped, I was described as Mohammed bin Abdulla, Ogaden, Bagheri, rer Hamar. That was dreadful. Do I look like a Bagheri, rer Hamar ? They are Midgan, outcasts. Do I look like a Midgan ? Just look at my beauty.\* page 303 the Mad Mullah of Somaliland.**

Maalintii shanaad ayuu waraaqidii farinta ahayd ee Cali Guxar iyo ergadu sideen jawaabteedii bixiyay:

***" This letter is sent by me to His Excellency the Governor Archer.***

***" I inform you that your messengers reached me safely in good health, and all here were pleased with them. I have accepted the peace terms they brought me willingly, but not under compulsion, namely:***

***" 1. You are to return to me my stock, consisting of camels, cattle, sheep and goats, ponies, mules, and donkeys, my slaves, firearms, coins, anbar (scent), diamonds, pearls, feathers, and reading books.***

***" The golden coins amount to £100,000.***

***" The feathers are the feathers of 900 ostriches.***

***" Piastres, 30,000.***

***" Dollars, 20,000.***

***" Other small coins not counted.***

***" 20 boxes of anbar (scent).***

***" Five boxes of diamonds.***

***" 1,000 pearls.***

***" Two pieces of ivory.***

***" Very many firearms, among which there were four machine guns (two large and two small), four other guns (one of four shells, one of two, one of one, and the other small), thirty Maxim guns, many revolvers, and all kinds of rifles.\****

*" This is one condition.*

*2. The other is that you return to me all those of my men who may have fallen into your hands either on desertion from me or captured by you in war.*

*3. The third condition is that you give me back all my land as well as the buildings demolished by you, and that you also afford me aman with no enmity on the part of the War-sangli, Mijjertein, or others.*

*" Oh, Governor Archer! I am Seyyid Mohammed! I know you! When lately I was ill-treated by the Italian Government, who caused trouble between myself, the Mijjertein, the Hawiya, and the Ogaden by giving firearms to my enemies, I warned the Italian Government that I was offended with them on account of their ill-treatment, and that I had moved to the British side of the border to avoid all fitna (quarrels). My intention then was to send you a letter with some of my elders and a caravan but, before this could be done, you attacked me without any cause or fault of mine, and I am oppressed. Further, the aeroplanes have oppressively attacked me, and this is a great abuse to a man in my position. You have also killed forty of my children who were infants and innocents. You are, therefore, liable for their blood-money.*

*" I have heard that you are a good man and there are others who are my enemies. I am, therefore, quite willing to undertake your settlement."*

900 oo baal-goryo, 20 sanaduuq oo Canbar ah, sanaadiiq luul iyo dheeman ah iyo waali maskaxdiisa ka buuxda marku sheegtay in loo soo celiyo , ka dib wuxu waraaqda ku soo gabagabaynayaa “ Carshow waa Sayid Maxamed waan ku aqaan, Talyaaniga ayaa Majeerteen , Hawiye iyo Ogaadeen igu soo hubeeyay sidaasna igu kaliftay inaan xadka Talyaaniga ka soo guuro, ee anigoo is le fariin ku soo dir ayaad colkii igu soo saartay, dayaaradana waad igu soo dirtay, mida kalana 40 ka mid ah caruurtaydii baad dishay, intaasna magtooda adaa qaba oon kaa doonayaa, waxa igu maqaal ah inaad nin fiican tahay sidaas awgood diyaar baan u ahay inaan yeelo gartaada (is dhiibka”. Ninkaasi waa ninkii ku gabyi jiray:

Gaalada dirayska leh anaan, daabadda u qabane  
Anaa diiday dagal inaan la galo, daalin ii colehe  
Dalka ma lihid anigaa ku idhi, doora weynaha e  
Anaa diiday nabadiisa aan, daacad noqonayne  
Anaa diiday deeqdiisa ay, naari dabataale  
Dahabkii uu waday waanigii, daadiyee qubaye  
Dagaalkiisa anigow xishoo, daalib ku ahaaye  
Durdurada Fardowsaad anaa, doortay oo rabaye  
Anaan labada daarood tan hore, darajo moodaynin.

Shaki ma laha ina Cabdulle Xasan inu ahaa axmaq dantii yaqaan ah oo marku jabana waxar ka yaraada marku awood helana maatada ka xishoon, hadaba sidu isagu jeclayayna u dhiga gabayadiisa oo dadku balanced maqleen laakiin ficiladiisa ayaa gabayadiisa ka xaqqiyo iyo qiyaas fiican, nin kaste geesi iyo balaayaan ahay waa ku gabyi karaa laakiin

ficilkiisaa laga gartaa. Sidaas bay ergadu ku laabtay , caruurtii iyo maatadiisiina loo soo daayay ina Cabdulle Xasan ayagoon wax dhibaato ah loo gaysan.

Waxa sanadkii 1999kii dalka Sweden buug ku malmaluqay nin la yidhaahdo Abdullaahi Hassan Rooble oo qolada Daaroodka ah sida naxliga buugiisa ka muuqada , buugaas wuxu ugu magac daray gabayadii Guba una bixiyay buuga **“Silsiladda Guba”** wuxu buugiisa ku andacoonayaa inay dadkuba kala ahaayeen Daarood raacay Daraawiish iyo Isaaq raacay Ingiriis **“typical Daarood narrative”** , taariikhda Gubana wuxu ka bilaabayaa hantataataacay ka barten gurboodka Daarood dajaalka Aw Jaamac aa ah eriga **“gaalo iyo cawaankoodii wuxu yidhi ninka Abdullaahi “markii Ingiriiska iyo Soomaalidii cawaanka u ahayd dagaal ballaaran oo cir iyo dhulba leh ku qaaday Daraawiishta fahiday Nugaal 1920kii”** cawaaqib xumaday leeday xarumaa tacliinta ee Daaroodism waa taas, umad 30 sanadood laga dhaadhicnayay Daarood baa ingiriis diidanaa iyo Daarood baa ka maqanaa dagaaladii Taleex iyo Badhan, hadii xataa been la sheegayo waxa la sheegaa been runta u sansaan eeg , waa ogsoonyay xaqiiqada ninka Abdullaahi isaga iyo waxa la hayb ahiba ee se cida lala hadlayaa maaha dadka Xoog-ogaalka ah ee waxa lala hadlayaa waa maxasta Daarood waa irbada sunta ah ee ku mud intaanay korin, waa ciyaalka Daarood ka dhaadhici inay bari ahaayeen wada Daraawiish , Isaaq iyo Ingiriisna isu jabiyay.

**“iyaga (Isaaq) oo ka faaiidaysanaya fursada qaaliga ah ayuu ciidan tiro badan oo somaalidii Ingiriiska raacsanayd oo sooc ah oo uu abbaanduulle u ahaa Xaaji Maxamuud Waraabe oo Habar Yoonis ahaa , waxaana abaabulay janan Ingiriis ah oo magaciisa la oran jiray Sir Geoferry Archer”**

Isagoo sii wada mala awaalkii armada Daaroodism ka laga shubo ayaa wuxu odhanayaa

**“markii daraawiish laga soo jeestay waxa mammalian Ingiriiska dadkii jacana go’aansadeen in qolooyinkii Daraawiish taageereyay ciidamo iyo cudud la dul dhigo si aanay mar danbe madaxa ula soo kicin . Kolkaas ayaa habar Jeclo Dhulbahnate dhulkisa ku durugtay oo Nugaal ka saartay. Habar yoonis iyo ciidagale ba waxay markiiba ku duuleen carro Ogaadeen , waxayna qabsadeen oo isku ballaariyeen Walwaal, Wardheer , Bulaale. Labada qolo midtown ma lahayn awood ay iskaga celiyaan Isaaqa hubkiisa, Ingiriisku markii uu daraawiish iyo taageerayaasheediiba meel ku habsaday ayuu u soo jeestay iny dhulku haystay nidaam dawladeed ka dhaqangaliyo.”**

Waxa kaliya ee ku filan beentaas Is-mahdinta ah in cidu leeyey dhul baa laga qaaday oo Daraawiish bay la socodeen waa reer Hagar oo reer Caynaba ahaa iyo Maxamed Subeer oo gaar ahaan reer Cali (Bulaale) iyo reer Cabdille (Doollo) labadaas reerba inaanay maalin fooda galin Daraawiish. Waxa se qosol ah kuwu leeyey (waa H.Y iyo H.J) Ingiriis bay raacsanayeen, hadii la barbar dhigo kuwu Daarood ahaan Daraawiish ku sheegayo (waa reer Hagar iyo Maxamed Subeer) jilabada Sacad Yoonis iyo Muuse Ismaaciil ama jilabada H.J sida Adan Madoobe iyo reer Daahir , inay ba kaga badnaayeen Daraawiish labada jilib ee u leeyey daraawiish bay ahaayeen. La yaab ma laha dadkani oo horaa loo

iyidhi **“Daarood kal naxduu leeyee kal xishoota ma laha”**. Ingiriis oon dalkaba joogin ayay Garxajis harooyinka Daroor, Gar Duur iyo ceelka Awaare ba qabsadeen 1865-1870 , laakiin malaa Jaalluu dagaanada la kala qaaday wuxu ka bartay Doollo iyo Caynaba.

Abdullaahi Hassan Rooble Guba buug kama qorin ee wixii uurka reerkiisa ku jiray ayuu buug ku daabacay, Taleexdu leeyeeey cid baa lagu weeraray iyo Midhisho iyo Jiidali iyo Barran, Taleex iyo Barran ba waxa cods day in Daraawiish looga xoreeyo qabiilada Harti oo ceelashoodii iyo daaqoodiiba Daraawiish ka xoogtay maatadoodiina u soo qaxeen marsada Berbera , Maxamud Garaad, iyo Faarax Garaad ilaa duqoodii Cali dhuux waxa loo soo qixiyay Berbera , Hagar Adan iyo Wacays Adan laga bilaabo 1903 sidu Ltd Kirk buugiisa ku sheegay waxay u magan galeen Habar Yoonis Burco . Waxa taariikhahaas ka markhaati kacaya **“British House Of lords debate “** doodii dawlada Ingiriiska baarlamaankeeda kaga doodeen waxay ku saabsanayd sidii looga badbaadin lahaa Daraawiish maatada Dhulbahnate waxa ugu hal qabsi haboon dood Lord Ingiriisi ka jeediyay Fadhiga Golaa Odayaasha ee Ingiriiska isagoo le

**“ waxad ii sheegtaan waxay ku kala duwanyiin dadkaa Ingiriiska ee cashuurta (the british tax payers” bixiya iyo reerka Dhulbahnate oo weligoodba ina jacana (our freindly tribes), waa maxay sababtay dawlada ingiriiska uga cago jiidaysaa inay horarka Mad Mullah ka difaacdo maatada berbera loo soo qixiyay ee Dhulbahnate” 1911 Debate of British House of lords.**

Haday Daraawiish ahayd Isaaq Vs Daarood siday u dhigayaan Jaalayaasha kacaanku , Dhulbahnate uma soo qaxeen galbeed Sacad Yoonis iyo Muuse Ismaaciilna kumay hadhi lahayn Jiidali iyo Midhisho, malaa jaalahan waxa ka qaldan inu dhulkaasi yahay dhul Isaaq. Dhulbahnte baa taabcsanaa Daraawiish oo waxay ka soo qaxeen Daraawiish Ingiriisna way u soo qaxeen !!! Isaaq baa Ingiriis taabcsanaa oo Midhisho iyo Jiidali bay awood ku joogeen ??, waxaas oo dhan waxa burinaya dhacdada markii Daraawiish laga saaray Taleex cida masharaxada la wareertay oo wada ahayd Daarood dhulkoodii looga xoreeyay horarkii ina Cabdulle Xasan oo waatu Cali Dhuux ku lahaa tonkaad na haysay waanu ka raysanay:

**Tunka layma soo qaban tani iyo taadi dabadeede  
Hadlkii la tuug-tuugi jiray waa ka toognahaye**

**Iyo**

**Waa lagu digtaa duul haduu kuu darnaan jiraye  
Daaduunka ku dhacay aw Maxamed waa ku diirsadaye  
Bal dayaay Wadaadkii waakaa sii dabayshadaye  
Darmaan qalay wuxu duunyo offside’s**

Wadaadku laftiisuba taas waa ka marag-kacayaa oo gabaygiisa Dardaaran ee waxyaabaa badan lagu daro waaka arintaas mashaxarada iyo faraxada Daarood ku sheegaya inay ayagu jabkiisii u qaateen xorinimo ay xoroobeen. Maadama dagaanada Isaaq (H.J iyo H.Y) Daraawiish aanany weligood qabsan jabkii Daraawiish wax sidaa u weyn Isaaq

kuma soo kordhin .

Garbage enter

Waxa Guba iyo Taariikhdaas Hagoogane inagaga filan ragii goob-joog ka ahaa dhulkaas la hantiyay , Gubana ka gabyay , waa Jaamac Xirsi Guuleed oo cajalad aad u qiimo badan Ina Diiriye Caraale kaga duubay Jaamac oo gabobay 1974kii. Inkastoo aanu jirin nin nolal ku soo gaadhay taariikhdiisii Guba marka laga reebo Ina Dube (Jaamac Xirsi Guuleed) cajaladiisana u maqlay Jaallaa buuga qoray , hadana wuxu ka doortay ku-tiri-ku-teentii Daaroodku isla dhex marin jiray ee ahayd **“cali baa afka la qabtay”** iyo **“gabay baa laga maqlay Makhaayad”** . Jaamac wuxu yidhi Daraawiish oo markaas haysatay dhulkan Doollo gaar ahaan ceelka Wardheer intay Daraawiish qoriga ka soo jeediyaan labada Daar ee Wardheer ee Ilaalada ah ayaa wax alaale iyo wixii Ogaadeen ah ee ceelkaas ka caba bartaas lagaga toogan jiray, Jaamac Xirsi wuxu yidhi Isaaq Daraawiish bay dhulkan ka riixeen kana xoreeyeen ee Ogaadeen carada ma joogin oo Daraawiish baa qixisay oo markay Habar Yoonis qabsadeen Doollo ayaabu Ogaadeenkii la qixiyay dib u soo laabtay oo dib ceelsha uga cabeen , :

Nin dulmiyay Ogaadeen hadii cdi ka doonayso  
Dunjigeeda Soomaali baad ugu darnaydeene  
Duuflaal Wadaadkii noqdaad daawo ahaydeene  
Idinkaa Danood iyo ka hiray degalladiisiiye  
Daraatoole iyo Faafan oo wada duraabaya  
Deegaanta haro oo dhan baad dacar ku dheehdeene  
Deex iyo madheedhkaa baxaan goroyo daaqayne  
Dixidii Qarandi waa taad qalfado dab u samayseene  
Dubuqaad ka soo bedizen loogu degi waaye  
Jeeraan daqiiqaha ka dhigay Dollo laga caagye  
Darandoori loogama horayn dararkii Gafoowe  
Dukaanada waxa dhigay raggi dahay wadaadkiye  
Waxan ugu dabbaal degay markaan helay dallalkaase  
Aan dirita kaga qaaday kii dawladda ahaaye

Xaqiiqaduna waa taas oo gabayada Guba ayaabay ku wada jiraan doodadaa lays weydaarsanayo. Meel u Ingiriis iyo Sawaaxili cid intu shiriyay yidhi dhulka halaga riixo iyo madaxa yaanay la soo kicina ma jirto ee waa khayaaligay ku murqaamaan qoloyaha Jaale Daarood, oo nina ma jecla inu yidhaahdo waa nala jabiyay oo cudud iyo awood baa nala dul saaray. Hadii hub laysa siiyo dhul lagu qabsan lahaa Abdullaahi Hassan Rooble qoladiisaa ku qabsan lahayd oo hub qabiil Somali helo taariikhda Somali cidna kagamay badnayn hubkay Daaroodku ka heleen Dawladii Afweyne , dhul ay ku qabsadaan iska daayoo intii hore ay daganaayeen ayaabay ka haluuleen. Hadii hub-gaal darajo aanu qabiil awal lahayn hominy , cid ka hub badnayd Majeerteen iyo Warsangali ma jirin hadana weligood may dhaafin afarta cariish ee xeebaa Bandar Caluula.

Inkastoo dagaalada Daraawiish iyo reerka Isaaq ba iska yaraayeen oo reerka dhibta ku hayeen ahaa isla Daaroodka, Duuflaalku hadana tiro dhowr guluf iyo dagaalo baa dhex

maray reero ka mid ah H.J iyo Garxajis ,tusaale geelii Dayax Weerer 1899kii iyo Geelii Daboolane 1912 oo Dooxatadu reero iska dagan mirtay, dhanka kale na tiro ilaa 5 Goobood oo Isaaq kaga guulaystay xoolana ka qaaday Dooxatada ay ka mid ahaayeen goobtii Caado 1917kii , goobtii Kal-Xoor . Geelaas Caado waxay Daraawiishtu ka qaadeen reer Subeerka Ogaadeen aadna loogu laayay, markii la caydheeyay Ogaadeenka ayuu ina Cabdulle Xasan gabay digosho ah weliba u raaciyay reeruhu caydheeyay :

**Ogaadeenka Ciideed ma dhamo caano loo shubaye**  
**Geelli cashuuraa lahaa coodidii helaye**  
**Camankayga waxa loogu riday calaf Ilaahaye**

Sidaa laguma dayne Ogaadeen xoolli laga dhacay waxa loo fadhiisiiyay ceelka Caado oo lagu cariyay inay ku soo dhacaan, Ogaadeen xoolihii kumay dhicin col aan la filayn oo dhowr boqol oo fardoolay beesha Habar Yoonis ah ayaa geelii Daraawiishta ka gacan maroojisay , Ina Cabdulle Xasan oo sidiisii marna caytamaya, marna calaacalaya ayaa hadana yidhi:

**Hashaan Habar-Siciid iyo hunbandii u weeraray**  
**Hashaan haro u oodee nina se igu hulin**  
**Hashaan huuro weynow Maxamed Zubeer ka hantiyay**  
**Hashaan heybta reer Magan waxba aan u hanbayn**  
**Walee maanta kii holay(H.Y) hoga dhiig kaga qoday**

Goobaa kale waxa ka mid ahaa Ilko-Cad , Gebagabo iyo Kal-Xoor uguna danbeeyey dagaalkii Hagoogane. Duulkaans waxay taariikhdu xustaa in markii la soo didiyey colkii 6da kun ahaa ee Daraawiish xoolii ugu badnaa taariikhda somalina la soo qaaday ayaa raggi guulaystay kibir la hagoogteen , marna sababta waxa lagu tilmaamaa inay markii labada col fooda is dareen si labada col ee tirada badan loo kala garto ayay Hagoogteen ciidankii Xaaji Waraabe.

**Almost before the *ergo* had voiced these sentiments there was to be striking proof of the wisdom of their forecast. For a party of Khalifs Dervishes and Ogaden made a successful raid on our tribes living near the southern frontier, driving off a large number of stock and killing many men, women, and children. For some years past the British Government had forbidden its tribes to raid the Ogaden in Abyssinian territory; but the latter, uncontrolled by their Government, had been free to advance into British territory and loot our tribes living near the frontier whenever they wished. On the whole, our subjects had abided loyally by the Government order, but, in so far as they were by far the stronger, it had naturally been most irksome to them to do so. They now decided that the only course open to them was to advance in force against the u Dervish-Ogaden elements and smash them before they could become a yet more serious menace.**

Sida Secretray ga mustcamarada Ingiirsaba sheegay Douglas Jardin 1916-1921 qabiilada Xuduuda Ethiopia daga (Garxajis) ayaaba ku dulmanaa maamulka Ingiiriska oo sababtuna ahayd Garxajis duulaan Ogaadeen ku qaado na waa lagu mamnuucay , Ogaadeenka oo Xabashi hoos yaalay duulaankiisa dan kamay lahayn inay xakamadeeyaan. Duulaankaas Khalifa iyo Ogaadeenkiisii ka dib waxay qabiiladu

go'aansadeen inay markan hogooda ugu gali doonaan Ogaadeen iyo Daraawiishba .

**All the responsible leaders were of this opinion, and when they approached the local Government to ask if they might put their project into effect, there seemed to be no further justification for adhering to a one-sided arrangement whereby our people, though the stronger, were restrained by their Government from raiding across the border while the Ogaden, free from all the shackles of civilised government and openly hostile to us, were at liberty to attack British subjects in British territory as and when they pleased. Consequently Akil Haji Mohammed Bullaleh, commonly known as Haji Waraba, or the holy hyaena, on account of his truculent and martial qualities, was allowed to organise a tribal army of some 3,000 Habr Yunis, Habr Toljaala, and Dolbahanta fighting men. Towards the end of July, 1920, they reached the Mullah's *haroun* at Gora'h, west of Shinileh, where the Mullah and some 800 Dervish and Ogaden riflemen were concentrated. Khalif and the Mullah's eldest son Mahdi had but recently died of the smallpox which was ravaging the district. The attack was delivered at dawn.**

Halkaas waxa ka cad inaanay wax shaqo ah ku lahayn Ingiriis qabaaalkii guutada Hagoogane isu keenay oo ay been xaaraan ah tahay waxay sheegaan jaalyaashaa Daarood, laakiin dawalada Ingiriiska oo awal dagaalada lagu qaado Ogaadeen mar kaste hor joogsan jiraty xoolaa laga soo qaadana dib u calin jirtay markan way iska indho tireen duulkaanay qaadayaan qabaaalku.

Colki Hagoogane dawlad Ingiirsna shaqo kuma lahayn qabaaalkii ay awal ka hir jogtay duulaan ay ku qaadaan dhulka Ogaadeen ayay se markan fashadaday oonay hor joogsan siday awal u hor joogsan jirtay oo xataa marmarka qaarkood xoolaa Ogaadeenka laga qaado loo celin jiray sidii kuwii Xaaraama-Cuno. Ciidanka waxa loo abaanduuleeyay Xaaji Waraabe 3000 oo H.Y iyo H.J iyo Dhulbahnate ah goor subax hore ah ayuu coolkii soo galay Qoraxay.

Ciidankaas waxa ka mid ahaa 12 gabayaa iyo 20 faaliye sidu u soo wariyay taariikhyahnkii Xaaji Maxamuud Daallin (1868-1990), habeen ba nin ayuu Xaaji waraabe odhan jiray gabay habeenba nin baa faalin jiray. Ciidankaas oo dhex ku soo jira oo ka soo kicitimay Buhoodle .

Colkii "Daraawiishta" oo ayagana imitaankoodii Qoraxay ku beegnaa colka Buhoodle ka soo duulay, ayaa waxay la soo dageen beeshii gabayaagii Qamaan Bulxan Qamaan Bulaxan iyo reerkiisuba la col bay ahaayeen Dooxatada oo sanadkii Dayuuradaa waakii Qamaan Bulxan iyo Xarbi Dheere Ba dhaantada u ciyaarayeen sarkaalkii Ingiriisiga ee Carshe Dheere Qamaan maalintaas wuxu ku heesay taageeraday Ingiriiska u hayaan isagoo le:

Raggi Qoraxay iyo Qalaafoo jiroo  
Qamaan u hormood-yaahan nahaye  
Daraawiish raggii ka diiday colkoo  
Dagaal ka horjeediyaan nahaye  
Ragaan ka baqayn balaayada oo

Badheedh u beer dhigaan nahaye.

Sidii oolka iftiin badanow  
Caarshow wiil amiiraad tahaye

Sidii onkodkii arkaa baxayaa  
Dhaandhaamo afkoodii weeyaan  
Daraawiish raggii ku duuli jiroo  
Deldeler doorarkoodii baanu nahay  
Taleex ninka degay ku deyn meynee  
Annana waan ku daafacaynaa  
Inu Xarbi xoolo gabay cuno  
Xalaalnimo kuma istaahilo  
Ninkii cududlaa ciyaari karee  
Caleen iyo ubax carfoon badanbaa  
Caarshoo mudan caawa loo sidaye  
Ninkii calan le baa caweyn karayee  
Ingiriis cududiisu weynaa.

Dhaantaas Qamaan Bullxan iyo Ogaadeen waxay ka daadagi wayday Aw Jaamac iyo  
Idaajaa , bari dhawayd ayuu Axmed Idaajaa ku daray arintaas in Qamaan u ku xigay Cali  
Jaamac Haabiil oo isna tiriyay baraanburkii “ Sidii Habar Dhali Weyday” isagoo weliba  
hore cajoled ku dubay inu baraanburkaasi ahaa 1956 , ayaa sidu Qamaan Bullxan arinta  
uga duwo ayuu Cali Jaamac Haabiil oo noolaynba 1919kii ku masabiday baraanburkaas u  
isagu alifay.

Markii Qoraxay laysugu yimi ayaa iyadoo la wada cawaynaayo ayaa Duufalaal ina  
Cabdulle Xasan yidhi "**waar anaku hadaanu nahay reer Taleex weys naago-niqiine  
qoladiinan reer Qorraxay dumarkiina tee u qurux-badan**"  
Duufaafka oo ku caan baxay dumarka faraa badan oo hadba gabadhu damco ninkeeda ka  
qaada oo markaas ilaa 32 dumar ah wuxu furay iyo wax u qabayba lagu oгаа ayaa marku  
hadlakaas yidhi qoladii Ogaadeenkii yara aamuseen, nin isla beesha dagaanka ah baa ugu  
jawaabay "sayidii" naag waxa noogu qurux badan Naado Buraale, dee Naadana adaaba  
qaba" Duuflaalkii baa yidhi " waar Naado waa laydin ogyahaae yaa kale" nin la odhan  
jiray Gaashaan baa markaas yidhi "sayidii" lagu waran:

Gaashaan wuxu yidhi:

Qoraxay badhtankeeda iyo  
Billaadkan naagaha jooga  
Bilcaan reero qabaan iyo  
Carmal waa hore la buubshiyo  
Inan feedha baarkiyo  
Boojaal weyn iyo dhoocil  
Isu soo bixiyo  
Barni sheekh Cabdillaa



Bilaadkan u qurxoon  
Cadaanta wa bil Iftiinta  
Guduudka waa Barni luula  
Dhararka iyo baaxda joogta  
Geri weeye bidhaanto  
Timuhu waa bulay-cad  
Cirridku waa bad madow  
Laxaadkeeda balaadhan  
Marka ay babacdee  
Bidixda laafiyo qurxoon  
Baxaaligeeda hanaanka  
Dabciga loo bohologyoobo  
Marka aad barato  
Biligeeda hufnaanta  
Edebtuu lagu beeray  
Aduunku waa wax balaadhane  
Hadii aad dhex butaacdo  
Il iyo baal kama qaadid  
Barni sheekh maqalkeeda  
Barigee kuugu horreysay

Markuu Gaashaan tixida dhameeyay baa Duuflaalkii yidhi Barni Sheekh yey u dhaxday , marku yiqiinsaday inay u dhaxday Qamaan, buu hadana yidhi isagoo Qamaan la hadlaya " **Adigu Qamaanow gaal baad tahay oo meher kuuma qabtee maad naagta ii keentid**" Qamaan baa intuu naxay yidhi " **sayidii hada Muslin Daraawiish ah baan ahay**" Duuflaalkii baa yidhi " bal aan naagta kuu daayee horta i tus" Qamaan oo tallo ku ciirtay baa qiil wuxu ka dhigtay cudur isagoo geeraaraya

Qamaan Bulxan wuxu yidhi

Sayidii cudur seexshaa  
dadka oo soconayyo  
fantaasabatay reerkee  
Beriga uu safku dhaafee  
Caafimaad nala siiyaan  
Taa ku soo tusayaaye  
Ha ahaato sidaase  
Sayidii ma sugnaa?

Qamaan habeenkaas wuxu ku talo goostay inu geeliisa iyo xaaskiisba la goosto oo ciidanka Daraawiishta ee hadheeyey ina Cabdulle Xasana dul dhigay reerka dhinacuun u dhaafto oo si uun uga baxsado. Ilaahay amarkii dhanka kale colkii Hagoogane ayaa Qoraxay soo dul fadhiistay, Xaaji Waraabe oo ilaaladiisii ilaalinayso ayaa raggi gabayaa ahaa isugu wada yeedhay iyo raggi faalin jirayba wuxu xaaji Waraabe yidhi " raggi gabyi jiraw caawaa gabayga idinku danbaysa caawa bahalkaa sumad ku dhig , raggi faalin

jirowna bahalkaaga sumad ku dhig , maxaa yeelay bari waxaynu is galaynaa Huwan iyo Daraawiish caawa nin walawba waxba hala hadhin" nin baa kacay la odhan jiray Dhaban Leexshe wuxu yidhi " caawaan sheegayaa ninkii i watay, halkay nimankaasi wax dhigeena eri dhigi maayo, murankaanu diidayaayo cidlaan u kacayaa muran l'a ah"

1- aroorta markaynu dareerno ee dhabadaa marayno garanuugta lamaan ee dhasha wadata ee xagaafka ordaya ee guutada meel ay ka dhaafto weyday sii daaya hayna dhaaftee.

2- midna waa muran l'a , markaynu taas dhaafno ee xarunta in yar u jirno qaalinta madow ee dhagaa go'an ee abeerka ah ee geela xarunta fadhiiya ka soo fool dhacday, hashasna sii daaya hayna dhaaftee

3-midna muran la weeye, markaynu xarunta galo dameerka madow ee marku in arko danaaniyi doona ee xarunta kicin doona nin boqor ah oo madax ahoo madi ah ayuu durayaa, xabada ugu horaysa Xaaji Waraabow dhafoorka kaga dhufo. Gabayagaai

Gamuute wuxu yidhi habeenkaas:

Ilaahii i abuurayee  
Illaliinka ahaa iyo  
Udgoonoow Nebigii  
afartii amaranaa  
awowgay sheekh Isxaaqow  
arrinkaan la tiraabo  
Aqbalkiisa i sii  
Eeraaney ku kaxaynay  
Asluubey ku xabbaadhay  
Arbow Xaaji Waraabe  
haddaan geela Awaadho  
Haddaan Oohow idhaahdo  
Illintuu ka gelaayo  
Haddaan Oodda ka jiido  
Haddii Eebbe ku siiyo  
Markaas aad aragtaan  
Hashaan geela ka aawo  
In lay (iiri) doono  
Axdigeeda i sii  
Ugub weeye guduudanoo  
Aydhin weeye maqaarloo  
Ayaamii Toddobkiibay  
Awr madow ka qaleenoo  
Afarteeda Iboodna  
Sidii Laas la af gooyey  
uun dhabay harqisaa.

3dxdii arimood ee faalayaa markii la arkay ee labadii col is galeen , ayaa sidii caadada u ahayd ina Cabdulle Xasan firdhaday isagoo dhaawac ah oo dhaawax halkaas naaska dabaddii ka gaadhay, colkiisiina kala yaacay, gidii maalintii wuxu maadhiinku qalceeyaba

Isla markii dagaalku bilaabay Xaaji Waraabe isagoon dhinaca eegin ayuu toos u weeraray hoygii Ina Cabdulle Xasan oo aqalkiisii daaha ka jaray oo u galay:

**All who stood and fought were killed by our tribal army; and some 60,000 head of stock and 700 rifles, numbers which give some idea of the growing strength of the Dervish-Ogaden concentration, were afterwards brought back into British territory. At the first onslaught, Haji Waraba himself, anxious to win the price set on the Mullah's head, had made straight for the Mullah's hut only to find that its occupant had fled. He must, however, have been taken very much by surprise : for his tea was still hot in its cup and his skull cap lay beside it on the ground. After calling upon the riflemen to hold up the attack until he had had time to get away, he had galloped out of the camp with a few of his intimates, intent as usual on saving his own skin.\***

**Inkastoo dharagu dabka u saarnaa oo u qaxwo u cabayay weli kululaa koofiyad u xidhanaana meesha taalay , ina Cabdulle Xasan oo ilaahay hibo gaar ah oo dada shilis siin ku manaystay ayaa isagoo weliba faraskiisa fuuli Karin ilaa la saaro mooyaane hadana baxsaday siday caadadu ahayd.**

Qamaan col soo duulay ayuu ku badbaaday Barni intu gacanta qabsaday isagoon xoolana haleelin isna cararay. Markii xaruuntii la qabsaday Daraawiish ku sheegiina laga dhigay waxa dhintay iyo wax carary ayaa Gamuute ku soo laabtay Xaaji Waraabe isagoo baadi goobaya hashii Gabayaaga oo ka luntay kana raacday xoogaagii Dhulbahnate ee ku jiray guutada Hagoogane,Gamuutaa yidhi " inadeerow Xaaji Waraabe , aduun waa yaabe , hashii aad ogayd waxay iga raacday colkii Dhulbahnate bay iga raacday, inadeer hadii la guuro ka xulan kari maayee, Col igu dar aan kala dhex baxee". Xaaji Waraabe ayaa intu laba nin amray yidhi "Ismaaciil Faarax Waab iyo Xaaji Khalaf waxad tidhaahdaan , bari nin guuraa ma jiro ninkaas 100 nin oo dab le ha raacaan ,ardaa wal oo dhulbahnate ah halaga baadho," markii hashii la helay ayaa isagoo qoslaya Xaaji Waraabe ku yidhi Gamuute "abaahaa la janeeye hada maxaad odhan lahayd adaa hashii lumiyeey" markaasuu Gamuute yidhi:

Gaanniga Waraabe iyo hashaan guuriska u soocnay  
Raggii wada gammuurraa hashuu golongolee dhuubtay  
Gaadiidka xoogga leh hashii garabku iimoobey

Gurguurshaa awrka ah hashii Galawga loo taabtay  
Gahaydhkii Dannood iyo hashaan gudurigaw ruugey  
Gaaliyo hashaan ula col baxay gaasamo is raacay

Wixii gacal cid ii xigey hashaan goonni uga duuley  
Nin xigaaladii gaanji tahay geel ma saanyado'e

Solamadow hashaan ula gedbaxay Gulufki reer Daahir

Guutada faraa badan hashii goob isugu keentay  
Galaayuuska subaxdii hashuu Galawgu dhiillaabay  
Feedhaha hashaan uga guntaday gocor ma yeeleene

Gurraati iyo haddaan Hara-Digeed Gocay horuu dhaafshey  
Geyigiiba waxa iiga hadhay galab carrawtiine  
Anigoo gacmaa laabtayoo gibil madow yeeshay

Mar haddii raggaa ila ged ihi geeyo haliihiisa  
Gadhcaddihii adoogay ahaa way garnaqayaaye  
Markaan gurigi geeyana Libaax geesta haw rido e  
Guullow Allahayoow hashaa galabta hay seejin

Guutadii Hagoogane waxay soo dhiciyeen xoolii Daraawiish somali ka dhacayeen 20ka sanadood eey lahaayeen Gaalaanu la dagaalamaynay oo dhamayd 50,000 oo neef iskugana jirta geel, lo' iyo fardaba. Ina Cabdalle Xasan wuxu u cararay xagaa iyo Iimey oo ka dib gabadh 14 jir ah ku guursaday qabayna ilaa 6 bilood dhawaacii Hagoogane uga dhintay (gabadhu waxay 2005kii ku noolayd Beledweyn ayadoo d'a ah sheegtayna inu dhaawacaas u dhintay mar laga waraystay internet ka " Jamaad Cabdulle Xasan oo ina Cabdulle Xasan walaashii ah iyo Naado Buraaladii ugu qurux badnayd xaasaskiisa marku ka cararay waxa qasab ku guursaday sultaankii Oromada oo waatu Xuseen Dhiqle ka tirinayo gabayga "Qeyb Libaax" ee calaacalka ah, Xuseen markii Jaamaad iyo Naado oo ahayd xaaskii ina Cabdulle Xasan midna walaashii ahayd ka cararay ayuu Xuseen Dhiqle oo jeclaa Jamaad la baxsaday oo magan u noqddeen Oromda Caruusiga ah, maalintii danbe ayaa loo soo geed fadhiistay labadii naagood , Xuseen ooy ogyiin Oromadu inaanu ninka u magan ka ah naagaa u diidi karin baa gabayga Qeyb Libaax ku calaacalay markay kaxayatseen labadi naagood Caruusuu, Xuseen wuxu yidhi:

Qiyaashow libaax baa dhurwaa, qaybi yidhi soore  
Wuxuu yidhi hilbaha jeex bal qabo, qoon dhan baan nahaye  
Markaasuu qabbabaalihii, qoonsadoo dilaye  
Dharbaaxuu il kaga qaadayoo, hoor ka soo qubaye  
Afqashuushle goortuu dhintuu, sii qataabsadaye  
Qambaruursi iyo oohin buu, qoon dunuunucaye  
Dawacuu kolkaa soo qabsaday, sida qisaaseede  
Iyadoo qadhqadhi buu ilkaha, qoorqabkii xoqaye  
Wuxuu yidhi qanjaafula xumeey, tali qaddaarkaaga  
Adeer gacalle qaar iyo dalool, qaaxo iyo feedho  
Qummud iyo baruuriyo legiyo, qawdhiihi kuruska  
Kuu wada qorsheeyeye Islow, neefka wada qaado  
Markaasuu wixii qaday qabsaday, qoobab kadafleeye  
Wax la yidhi qabiil ma leh dayooy, qayliyaha aare  
Innagoo quruun dhanna maxaa, qado inoo diiday?  
Qacdi hore haddaan dayey kobtii, weerku sii qulushay

Badhbaa kuu qisma ah waa wuxuu, eeday qaar yare  
Aniguna qudhaasaan aho, lay qulqulateeye  
Duqii noo qab weynaa wakaa, qooqa loo dilaye  
Qaddaarkii Illaah iyo Rabbaan, quud ka sugayaaye  
Qudhaydaan u yaabaye miyaan, idin qasaarteeyey  
War ma anoon qudraba haynin baa, qamash ka soo waaqsan?  
Anna qayb libaax weeye taad, igu qasbaysaane  
Dadka igu qoslaayiyo kobtaan, ka qalbi diidaayo  
Qadayeey adduunyo uma socon, waad i qaharteene  
Qadankii dariiqiyo haddaan, qaniimadii waayey  
Labadii qofee nagaga hadhay, qaafadii dumarka  
Tii quruxda roonayd hadday Cali, la qooqayso  
Qudhoo kaliya baa nagu hadhoo, qalabku noo yiile  
Tana qaata Naadaba ragbay, qaac u shidataaye

Jamaad Cabdulle Xasan oo dhinacna duraysa reerka Naado Buraale (khalaf Yuusuf ooy iskugu yimaadaan jilibada reer warfaa, Amaadin iyo Maalin-guurku) kuna tuhmaysa markiiba inay Oromadii u godlatay ayaa gabay ay ku sheeganayso waxay tabanayso oo iskugu jira shuruuda guurkeeda iyo ayay Xuseen Dhiqle oo baqdin awgeed Oromadii gacanta ka saaray faraysa tidhi Jamaad cabdulle Xasan:

Xuseenow qof meel laga hayoo maadsan baan ahaye  
Murugaa igu raagtayoo qalbigu wey madwayahaye  
Mid yaroon ku faro iiga gee madaxada reer Dhaadhi  
Mudaday shiraan iyo ka wari madasha geedkooda  
Axmed iyo Mukhtaar iyo u sheeg qoonka Maxamuuda  
Xasan iyo Qiyaash-Maash abtow dhab ugu maaweeli  
Malaw dhimo'e reer Muxumadow waa i moogtahaye dhe  
Maxaad igu mu'ahateen sidii Naado miis darane  
Magaceed ba' falan baad hesheen oo muraadoah'e  
Malaamida Khalaf Yuusuf baad igu maslaysaane  
Marwo aabahay dhalay dad weys midho yaqaanaaye  
Ninkii aniga ii muhanayow ma ihi caynkaase  
Waxan ahay qof godobtiisa maqan miiyeydeed qabo'e  
Ee murdad baan habeen iyo dharaar meel la doobnahaye  
Macno ma laha xaajada sidaad milicsanaysaane  
Maroor kuma godlado goodirkaan micnayn igadh'e  
Inkastoo mudaahanada warqado laygu madadaasho  
Maqli maayo guur reer Dhaadhi maalik maa jiro'e  
Macbuudkii uuntaa qadiray moogan sidan ahaye  
Majnuun waalan baan samir aqoon mood haduu helo'e  
Mishmishiikhsigii iyo ka tagay milif ka boodkiye  
Magac iyo martabo loo xusho iyo muuno ina Admi  
Muquunabay caawaaba hadaad igu murmaysaane  
Magantiina goortaan noqday idin miciin mooday  
Markab jabay sidiisii weydinkii noo mohoobiyeye

Maatada dabkii laga dhacay iyo maalka noo celiya  
Waxay gobi ku maamulan jirtay waa milgo ee yeela  
Muslin idinka kii naga xigsada meesha laga waaye  
Marantaan idiin noqonayaa hadaan helo muraadkay'e  
Marxaba baan la taaganahay hadaan layga maarmayne

Waxan qoraalkan dheer ku soo gabagabaynayaa wax dada qaarkiina la fajacaan dada  
qaarkiina qosol ka keena , oo ah heerkay la marayso Jaale Axmed cibaadada qabyaalada  
Daaroodismka ah, isagoo ka sheekaynaya dhimashadii ina Cabdulle Xasan wuxu yidhi :

**” Subax ayuu xanuunsaday fiidkiina naftii bay kala tageen ka dibna waxa lagu aasay buurta Sarmaayo ee Iimay. Mudo ka dib ayaa wuxu Ingiriisku soo diray niman u safar ku magacaabay oo u safar ka dhigay , oo u yidhi lafii iyo qalfooftii Sayidka soo bixiya , markii la maqalay ayaa qolfoofii xabaasha waxa ka saaray nimankii Caruusada madax u ahaa ee reer Dhaadhi, oo Xaaji Isaaq Dhaadhi u ka mid ahaa oo Xamar nala joogay 1970 iyo 1980gii meesha Leegada ee Walanweyn, raggi ka saaray waxay yidhaahdeen wax iska badalay ina ma jirin jidhkiisii iyo lafahiisii , mararka qaarkood inu noolyahay ayaanu moodaynay”.**

**From this time onwards the movements of the Mullah became difficult to ascertain. He seems to have wandered for some time, but eventually he settled down at Guano Imi, a hill, half a day's march from Imi, at the head waters of the Webbi Shebeli in the Arussi country. Here he arrived with some three or four hundred followers in October, 1920. Feverishly, they built thirteen forts which they made as strong as possible. As soon as the Fitaaurari, commanding the nearest Abyssinian garrison, heard of the arrival of the party, he sent one of his officers to ascertain who the invader might be, and why he had entered Abyssinian territory. The Mullah received the officer well, and said that he had been beaten in battle by the British and had come to Abyssinia for protection. He sent the Fitaaurari four rifles and a revolver as presents and asked for some provisions in exchange. But none were forthcoming and the Mullah's messengers were thrown into chains. Then sickness, probably influenza, and famine fell on the Mullah's camp and on the 23rd November, 1920, he himself died after six days' illness. He was buried in a hut, a small tomb with a dome being erected over his body, the doors and windows of the building being then filled in with bricks. Most of his remaining followers died of sickness and hunger at the same time ; and the few that were left are said to have dispersed after his death to eke out a precarious livelihood by begging.**

**Wadaadkii Cadceed iyo cadceed laga cabsoonaayay  
Isagoo carrtiisa qaba cidana taataaban  
Qabiil kale ciyaar uma dhaceen culus hashiisiye  
Guutada camuudka ah kolkii ciiciiro loo galiyay  
Caamir hooyadii iyo kolkay calastu ooyaysay  
Waakii Caruusaha u galay caydhkii barigiye  
Nimankii calqadaa ka riday ma cid kalaad mooday**

Hadaba qabaalkii Somali iyo Daraawiish yaa gar darnaa? Idaajaa wuxu yidhi Somali oo dhan baa qaldanayd oo waxa saxsanaa daaquudkaaas dhiiga iyo xoolaa umada xalaalaystay, horaa loogu maah-maahay “wadar iyo waxed kumara waalan”, Ingiriiskan belaaayada laga dhigayo sidu dalka u yimi, xoog kuma qabsan ee hadaba goobtii u heshiiska qabaalka kula galay ayuu soo dagay, ka dibna dhulkii nidaam iyo kala danbayn somalidu u baahnayd ayuu u yeelay, dagaamada xeebaa ee Ingiriisku xukumaayay kama dhici jirin qabiil awood le inu sidu doono ka yeelo qabiilada yaryar, at ugu weyn ee meesha taalayna waxa weeye Somali ma ara baahi loo qabo nin aad adigu keentay iska xorayntiisa.

Aw Jaamac Cumar Ciise iyo Idaajaa Daraawiish miyay buunbuunin lahaayeen hadaanu hogaankeeda haysan lahayn nin Daarood ah? Waa maya Kawabata , Xarakada Al-Shabaab iyo Daraawiishtii 100ka sanadood ka hor ahayd wax alaale iyo waxay ficiladuudu ku kala duwanyiin ma jirto, waxa laba odhan karaaba Al-Shabaab ayaaba ka “jihaad” roon oo Al-Shabaab dad ay wax siiyaan mooyaane xoolo iyo geel umada ayagoo boobaya lama arag. Hadana waa mustaxiil inaad aragtid Aw Jaamac ama Idaajaa oo amaanaya al-shabaab oo hogaanka u hayaan niman aan Daarood ahayn.

Cajalada codka ah ee Idaajaa difaaca Ina Cabdulle Xasan ku duubay qiiro-jabaan mooyaane wax xaqiiqooyin ah oo u daliil ah manage Wadaadka Idaajaa wuu soo bandhigi kari waayay, doodihiisa waxa ka mid ahaa inaanu Wadaadku xoolaa umada dhici jirinba , waa yaab wuxu ninkaas madaxu cadaaday ku doodayo, ina Cabdulle Xasan ku faanka variant sawtan gabaydiisa ka buuxda:

**Nijaaskaan shalay mudmuday waa maqdinkoodiye  
Muusnowga Caynaashe waa mahad ilaalhiye  
Marasdi Berbera hawla kaceen Maatadaan dhacaye.**

Ninka waxaas ku faanaya ee kibirka noocaas ah ka muuqday ayuu Idaajaa cajaladiisa ku yidhi “ halala ooyo Ina Cabdulle Xasan oo halala qiirodo” intu gabaygiisii Gudban xoogaa tiriyay , eesh **calaa qiira waa halki dhanxiire.**

Ina Cabdulle Xasan isagoo fadhanfadh ka liita oo is xabaalay oo baxsad ah oo dumarkiisii Oromo ku duul guaranty ayadoo raaliya waliba Naado Buraale oo daiquiri uurka weynaa ka ray stay ayuu ku dhintay meel cidlo ah, kuwa maanta kaas tabayaa waa isla kuwa tebaya Dawladii Afweyne Bare, ma kala hadhaan labada Maxamed.

Waxay reerka Aw Jaamac iyo Idaajaa (Daarood) iyo reerkayga (Isaaq) anigaygan qoraaga ah, ku kala dawning reerka Daarood ma waayo daaquut ay daba nashleeyaan ka dibna ay la qaxaan ooy la daaduumaan , sida labadaas Maxamed iyo Cabdilaahi Yuusuf oo imika lagu hayo Yemen isagoo u eekaaday “**Darculla-vampier**” wax aanad u arkayn Isaaq cidla ku daaduumaa, Isaaq nin tuug ah ma daba nashleeyaan oo Isaaq ninkooda xun waa ka hadhaan ama dada waa ka qabtaa, arki maysid Isaaq ku naaloonaya daalinka Ina Godane ama hadal hayaba, sidaas awgeedna **Risaldar Muuse Xaaji Faarax (waxan dawlada Somaliland ka codsanayaa ina taalo loogu dhiso Xaajiga Taleexdu**

**xoreeyay**) isagoo karaamadaysan ayaa sidii boqor logu aasay Burco , **ina Xajii Ibraahim Cigaalna** loogu aasay Berbera, Afweyne iyo Ina Cabdulle Xasana ayagoo baxsad ah ayaa Somali ugu war danbaysay.

Daarood baraanburay haduu dux iga qaadaayo  
Dhaaxeeey habaar dareersheen dic iyo waayeele  
Dakhar nimu ku yaal waa gartii inu dawaamaaye  
Dameerkuba dushoo laga rartuu dookhad kiciyaaye  
Duunyaduu ugu liitaye si kale uma dinaahsheene.

Hayska dinaaheeyaan Aw Jamaac iyo Idaajaa.

Wa Salaamu Calaykum Wa Raxmatallaa Wa Barakaatu.

Kayse Jaamac  
gusuf78@hotmail.com